



Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha

MIISAANIYADDA DAWLADDA DHEXE EE 2025

Wadajir & Waxqabad



**JAMHUURIYADDA
SOMALILAND**



REPUBLIC OF SOMALILAND
جمهورية صوماليلاند

**XAFIISKA MADAXWEYNAHA
OFFICE OF THE PRESIDENT**

مكتب الرئيس

TIX: JSL/XM/GW/081-050/012025

Taariikh: 25/01/2025

Wareegto Madaxweyne

Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2025-ka,

- Markii aan arkay: Qodobka 90^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markii aan arkay: Qodobka 75^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markii aan helay: Go'aanka Ansixinta Golaha Wakiillada (Go'aan Lr; GW/KF-10/06/2025) ee summaddiisu tahay Ref; GW/G/14-10/06/2025, kuna taariikhaysan 25/01/2025, ee Miisaaniyad Sannadeedka 2025-ka;

Waxa aan Soo-saaray;

Dhaqan-galkan oo lagu baahinayo Miisaaniyad Sannadeedka 2025-ka oo qaddarkeedu dhan yahay SL.SH/= 3,894,462,279,363 (Saddex Tirilyan, Siddeed Boqol iyo Afar iyo Sagaashan Bilyan, Afar Boqol iyo Laba iyo Lixdan Milyan, Laba Boqol Sagaal iyo Toddobaatan Kun, Saddex Boqol iyo Saddex iyo Lixdan Shillin Somaliland ah).

Allaa Mahad Leh

Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland





Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha Wakiilladda



The Republic of Somaliland
House of Representatives

Mob: +252-513503

Xafiiska Guddoomiyaha - Office of the Speaker

(Hargeisa - Somaliland)

E-mail: speakersomalilandparliament@gmail.com

Ref: GW/4/12/41/2025

Date: 25/01/2025

Ku: Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)

Madaxweynaha JSL

= Madaxtooyada=

Ujeeddo: Soo Gudbin Go'aanka Miisaaniyadda Qaranka 2025.

Mudane Madaxweyne,

Waxaa aan si Sharaf iyo qadarin leh halkan kuugu soo gudbinaynaa Go'aanka
Miisaaniyadda Qaranka 2025.

1. Go'aanka Miisaaniyadda Qaranka 2025 (Go'aanka Lr. GW/KF-10/06/2025)

ALLAH MAHAD LEH

Md. Yaasiin Xaaji Maxamuud Xiir (Faratoon)
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL.





**The Republic of Somaliland
House of Representatives**



**Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha wakiilada**

Head Quarter Hargeisa.

Xarunta Hargeisa

Ref: Gw/Kf-10/06/2025

Date: 25 / 01 / 2025

GO'AANKA ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE 2025-KA

- MARKUU ARKAY:** Qodobada **53aad, 54aad iyo 55aad** ee Dastuurka Qaranka JSL.
- MARKUU DHEGAYSTAY:** Xog-waranka Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda ku iftiimiyay Odoroska Miisaaniyadda Dawladda ee **2025ka**.
- MARKUU DHEGAYSTAY:** Xog-warankii soo jeedinta iyo talooyinkii Guddi hoosaadka dhaqaalaha ee Golaha Wakiilladda.
- MARKUU U CODEEYAY:** Ansixinta odoroska Miisaaniyada Dawladda ee sanadka 2025ka kal-fadhigii 10^{aad} fadhigisii 15^{aad} ee **25/01/2025** oo ay goob joog ahaayeen **47** Mudane oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiillada.

WUXUU COD AQLABIYADA AH (44 COD) OO GACANTAAG AH KU ANSIXIYAY.

1. Odoroska Miisaaniyadda **2025** oo qadarkeedu dhan yahay **3,894,462,279,363 SL.Sh** (Saddex Tiriliyan, sideed boqol afar iyo sagaashan bilyan, afar boqol laba iyo lixdan milayn, laba boqol sagaal iyo todobaatan kun, saddex boqol iyo saddex iyo lixdan shiling oo Somaliland ah.



Faah-faahinta Dakhliga Miisaaniyada 2025

No.	Magaca	Budget 2024	Budget 2025	Faraqa
1.	Miisaaniyadda Dawladda Dhexe	2,530,336,471,858	2,575,931,251,888	45,594,780,030
2.	Miisaaniyadda Dawladaha Hoose	589,899,197,085	570,297,669,257	-19,601,527,828
3.	Miisaaniyadda Hay'addaha Macaashka Sameeya	277,792,895,534	273,633,516,978	-4,159,378,556
4.	Miisaaniyadda Mashriicda Baanka Aduunka iyo Baanka H.Africa	100,816,451,400	474,599,841,240	373,783,389,840
	Isku gaynta Guud	3,498,845,015,877	3,894,462,279,363	395,617,263,486

Go'aamada lagu soo daray Miisaaniyadda Qaranka ee 2024.

Goluhu, ka dib marka ay daristay Odoroska Miisaaniyadda 2025-ka, isla markaana ay dul istaagtay, lafo-gurtayna dhammaan qaybaha kala duwan ee Miisaaniyaddu ka koobantahay, isla jeerkaana la kulantay mas'uuliyiinta Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha, sidoo kale, tixgalisay codsiga Xukuumadda ee Miisaaniyadda, isla markaana, maanka ku haysa, ahmiyadda ballaadhan ee sharci ahaan, farsamo ahaan iyo siyaasad ahaanba Miisaaniyaddu u leedahay habsami u socodka nidaamka dawladdeed, waxa ay Gole waynaha si sharaf leh ula wadaagaysaan soo jeedinahan soo socda, kuwaas oo iskugu jira;

- 1) Go'aamo khuseeya kor u qaadida hufnaanta maamulka maaliyadda
- 2) Go'aamo khuseeya nidaaminta kharashaadka
- 3) Go'aamo khuseeya maamulka mashaaricaha
- 4) Iyo Go'aamo khuseeya kor u qaadida dakhliga

Go'aamadaas oo faah faahsanina waxa ay u dhigan yihiin;



1. Si loo helo hufnaan maaliyadeed waa in Hay'addaha Macaashka Sameeya ee dawladda iyo dawladdaha hooseba hirgaliyaan isticmaalka nidaamka maamulka maaliyadda ee is-wada ee la yidhaahdo (IFMIS)
2. Waa in Wasaaradda Maaliyaddu daynta Qaranka lagu leeyahay la xaqiijisaa, isla markaana, u kala horaysiisaa daynta muddada dheer iyo daynta muddada dhaw, isla markaana, Golaha usoo gudbiso warbixin faah faahinaysa daymaha Qaranka
3. Waa in sanad maaliyadeedkan 2025-ka Wasaaradda Maaliyaddu samaysaa Siyaasadda Dhaqaalaha Qaranka isla markaana usoo gudbisaa Golaha sida ku cad qodobka 2^{aad} ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Xeer Lr.75/2016
4. Waa in muddo lix bilood gudahood Wasaaradda Maaliyaddu Guddida usoo gudbiso qorshihii lagaga guuri lahaa nidaamka hadda loo sameeyo Miisaaniyadda ee loo yaqaan (Line-item budget) isla markaana loogu guuri lahaa Miisaaniyad ku dhisan Mashaariic iyo Horumar (Program Based Budgeting Model/Activity Based Budgeting Model)
5. Waa in muddo 3 bilood gudahood ah Wasaaradda Maaliyadu uu soo gudbiso Golaha Wakiilada liiska taciifadaha dalka kuwa la soo kordhiyey iyo kuwa u baahan Wax ka bedelka.
6. Waa in muddo lix bilood gudahood Wasaaradda Maaliyaddu ku diyaarisaa daraasad sidii kor loogu qaadi lahaa cashuuraha barriga si loo yareeyo in dakhligu ku tiirsanaado cashuuraha kastamada, isla markaana, maxsuulka daraasaddaas usoo gudbisa Guddida
7. Waa in kaalmada iyo kabka dugsiyadda Waxbarashada la siiyo loogu qaybiyaa tirade aradaydooda.
8. Waa in Wasaaradda Maaliyaddu kusoo gudbisa Miisaaniyadda iyo Warbixinaha kaleba muddooyinka uu cayimay Xeerka Maamulka Maaliyadda Xeer Lr.75/2016
9. Waa in Golaha Wakiilladu dedejiyaan Xeerarka Maaliyadeed ee horyaala
10. Waa in aanay hay'adna galin kharash ka baxsan Miisaaniyadda
11. Wax ka bedel kasta oo lagu sameeyo Miisaaniyadda waa in Golaha loo soo gudbiyaa sida ku cad Xeerka Maamulka Maaliyadda Xeer Lr.75/2016
12. Waa in Madax xigeenka kharashka isticmaalka alaabta iyo adeega ee Miisaaniyadda Wakaaladda Biyaha Burco laga wareejiyaa lacag dhan SLsh.500,000,000, isla markaana,



loo wareejiyaa madax xigeenka kaalmooyinka guud ee isla Miisaaniyadda Wakaalada iyada oo kaalmadaana la siinaayo, macaddada diiniga ah ee hoyga ah ee kala ah:


- a) Macadka Boodhinka ah ee Al-taqwa SLsh.150,000,000
- b) Macadka Boodhinka ah ee Imamu Shaafici SLsh.150,000,000
- c) Macadka Boodhinka ah ee Shamsu-diin SLsh.100,000,000
- d) Macadka Boodhinka ah ee Imaamu Awaadici SLsh.100,000,000

13. Waa in Sanduuqa Mashaariicda Horumarinta ee ku jira Miisaaniyadda Wasaaradda Maaliyadda xubnaha maamuulayaa ay qayb ka noqdaan Guddida Dhaqaalaha ee Golaha Wakiillada

Ansixinta Miisaaniyada waxaa diiday (1) Mudane, Halka (1) Mudane-na ka aamuseen, Guddoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL


Yaasiin X. Maxamuud Xiir (faratoon)
Guddoomiyah Golaha Wakiilada JSL





Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Maaliyadda iyo
Horumarinta Dhaqaalaha



Republic of Somaliland
Ministry of Finance and
Economic Development

Xafiiska Wasiirka

Ref: WM/02/08-01/ **96** /2025

Date: 25/01/2025

- Ku: Dhammaan Wasaaradaha iyo hay'adaha Dawladda
Ku: Dhammaan Taliyayaasha ciidamada JSL
Ku: Hantidhawraha guud ee Qaranka Jsl.
Ku: Xisaabiyaha Guud ee Dawladda
Ku: Agaasimaha Waaxda Miisaaniyadda iyo Qorsheynta
Og: Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Maaliyadda iyo H. Dhaqaalaha
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha
Og: Gudoomiyaha Baanka Dhexe JSL
Og: Gudoomiyaha Maxkamadda Sare
Og: Shirgudoonka Golaha Wakiilada JSL
Og: Shirgudoonka Golaha Guurtida JSL
Og: Madaxweyne ku xigeenka JSL
Og: Madaxweynaha JSL

UJEEDO: DHAQANGELINTA MIISAANIYADDA 2025.

Aniga oo Tixraacaya wareegtada ka soo baxday xafiiska Madaxweynaha JSL sumadeeduna tahay **JSL/XM/GW/081-050/012025** Kuna Taariikhaysan **25/01/2025** ujeedadeeduna tahay dhaqangelinta Miisaaniyadda 2025-ka. Isla markaana fulinaya hawlaha aanu Wasaarad ahaan ugu xilsaaran-nahay Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland, kuna dhaqmayna **Xeerka Kala-xadaynta Xukuumadda iyo Haaya'daha Madaxa banaan Xeer Lr.71/2015 (farqadiisa 30aad)**, oo qeexaya masuuliyadda guud ee Wasaaradda Maaliyadda iyo H.Dhaqaaluhu u xilsaaran tahay, **Xeerka Maamulka Maaliyadda Xeer Lr 75/2016**, Xeer-nidaamiyaha Maamulka Maaliyadda Qaybta **IV (3)** ee Maamulka & Dabarka Maaliyadda Dawladda, isla markaana ku dhaqmayna qodobka **55aad farqadiisa 2aad** ee dastuurka JSL, Waxaanu halkan ku faah-faahinayaa nidaamka loo raaci doono ku dhaqanka Miisaaniyadda sannadkan 2025-ka oo noqonaysa sidan:

1 | Page



www.slmof.org



info@slmof.org



9494



1- Dakhliga:

Dhammaan waaxaha dakhli soo saarka ee Wasaaradda Maaliyadda iyo H.dhaqaalaha, Wasaaradaha iyo Hayadaha kale ee dakhliga qabta ee buuga miisaaniyadana odoroskoodu ku xusanyahay, waxa lagu adkaynayaa inay ka hawlgalaan qiyaasta dakhli ee loo qoondeeyey, taas oo ku xusan shaxda deegaameynta ee buugga miisaaniyadda, idinka oo raacaya xeerarka Dakhliga Cashuuraha Berriga, Kastamada, Siyaasadda Dakhliga ee Miisaaniyadda 2025-ka, Nidaam Maamulka Maaliyadda Dawladda iyo Siyaasadda Cashuuraha Somaliland.

Waxaan ku adkaynayaa oo aan ka codsanayaa madaxda sare ee haaya'daha dakhli ururinta inay xil-weyn iska saaraan dabagalka, soo xeraynta iyo ogaanshaha heerka hadba Dakhliga ku qorani marayo. Sidoo kale, waxa la idinku wargelinayaa in cid kasta oo cashuur diid ah aad ku dabaqdaan ganaaxyada sharcigu jideeyey ee ku cad xeerarka dakhliga **Lr.72-73/2016**.

2- Kharashka:

Kharashka Miisaaniyadda 2025-ku, waxa uu ku salaysnaan doonaa hadba inta uu yahay dakhliga rasmiga ah ee ina soo xarooda (actual revenue receipt), taas oo la idinku wargelin doono wareegto hadba sida xaaladdu tahay, iyada oo laga duulaayo isku dheelitirka dakhliga iyo kharaska, lana dabaqayo xeerarka maaliyadeedka dalka u dajisan.

3- Awoodda Ogolaanshaha Kharashka (Expenditure Warrants)

Wasaaraddaha iyo Haaya'daha dawladda waxa lagu wargelinayaa inay awoodda ogolaanshaha kharashka ee saddex biloodka ah u raacaan hadba sida awoodeena maaliyadeed noqoto, iyadoo mar walba laydinla socodsiin doono duruufaha maaliyadeed, siiba Dakhliga aynu haysano.

Sidoo kale haaya'daha dawladda ee kala duwan waxaa la farayaa in aanay soo samayn ogolaansho awood kharash oo aan waqtigiisii joogin, duruufo gaara oo laysla waafaqsan yahay mooyee.

Waxa kale oo haaya'daha dawladda lagu wargelinayaa in dhabarka (expenditure warrant-ka) ku faahfaahiyaan darajadda iyo tiradda shaqaalaha ee ay hadba mushaharka u samaynayaan. Waxaana la farayaa Agaasimaha Waaxda Miisaaniyadda inaanay ogolaan (expenditure warrant) aan faahfaahinta shaqaalaha wadan.





4- Kharaska kala wareejinta Miisaaniyadda (Budget virement).

Kharashka kala wareejinta madax-xigayaashu waxay ka bilaabmi doonaan **1-da July ilaa 30-ka November** wixii aan ahayn xaalad gaar ah (*force-majeure*), Waxana awooda kala wareejinta leh Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta dhaqaalaha sida uu tilmaamayo qodobka **6aad** xarafka **B** ee Xeer-nidaamiyaha Maamulka Maaliyaddu.

4. Nidaamka loo raacayo kala wareejinta madax-xigayaasha.

Mada-xigayaasha mushaharaadka iyo gunnooyinka shaqaalaha looma wareejin karo madax-xigayaal kale.

Waxa kale oo iyana reeban in hal Madax-xige mar wax laga wareejiyo marna lagu wareejiyo iyo in iibsiga hantida raagta iyo mashaariicda horumarineed loo wareejiyo madax-xigayaal aan ahayn sifihii loo qoondeeyey taasoo baal marsan nidaamka maamulka maaliyadda.

5. Mashaariicda ku jirta Miisaaniyadda

Waxa jirta inay caado noqotay in kharashka mashaariicda loo qoondeeyey ay Wasaaradaha ama Hay'aduhu soo codsadaan in loo sii daayo iyag oon u samayn wax qorshe ah mashruucaas. Sidaas darteed waxa la idinku wargelinayaa inaan kharash mashruuc la sii deyn doonin ilaa aad soo gudbisaan qorshayaasha mashaariicdaas iyo kharashkooda oo aad soo jegebiseen (budget breakdown), waana in loo kala saaro kharashka tooska ula xidhiidha fulinta mashruuca (Development/capital expenditure) iyo kharashka kubaxa adeegga iyo shaqaalaha (*recurrent expenditure*).

Sidoo kale, Wasaaradaha iyo Haaya'daha isticmaala Madaxigayaashan hoos ku xusan waa inay soo gudbiyaan faah-faahinta isticmaalkooda sadex bilood kasta;

- Kharashka Sanduuqa Aqoonsi-raadinta
- Kharashka Safaaradaha
- Barnaamujyada Tv-ga iyo Idaacada
- Kharashka dib u habeynta shuruucda
- Kaalmooyinka


Faahfaahinta kharashaadkan sare ku xusani waa inay la socdaan ogolaanshaha awooda kharashka (expenditure warrant) marka siidayntiisa la codsanaayo.





6. Tilmaamayaasha kale ee Miisaaniyadda:

- I. Waxa ka reeban wasaaradaha iyo haaya'daha dawladda in la galo kharash dheeraad ah oo ka baxsan ku talogelka miisaaniyadahooda.
- II. Waa inaan isticmaalka kharashyada lagu koobin magaalo-madaxda oo keliya balse lagu fidiyo, laguna baahiyo dhammaan xafiisyada Gobolada & Degmooyinka dalka, si loo yareeyo cabashooyinka ka yimaada Gobolada & Degmooyinka.
- III. Waa in wasaaradaha & haay'adaha dawladdu saddex bilookiiba hal mar u soo gudbiyaan xisaab-celintooda kharash Wasaaradda Maaliyadda, gaar ahaan Xafiiska Xisaabaadka Guud, waxaana la idinku wargelinayaa in ciddii keeni weyda xisaab-celintaas loo sii deyn doonin Awoodahooda kharash ee saddex-biloodlaha xigga.
- IV. Cid kasta oo lacag gacan-ku hayn ah horumarin qaadatay, waa inay ku soo xerayso Khasnadda Dawladda lacagta ay qaateen inta ka horaysa dhamaadka sadex-biloodka, waxaana la idin ogaysiinayaa in ciddii aan soo xerayn lacagtii hore ee horumarinta ahayd (impress), aan loo ogolaan doonin lacag dambe oo horumarin ah, ayadoo laga hakin doono isticmaalka kharash miisaaniyadeed-kooda waafaqsan horumarintaas;
- V. Agaasimaha waaxdda Miisaaniyadda iyo Xisaabiyaha Guud waxa lagu wargelinayaa in Waarannada kharash ee soo gaadha ay hawshooda ka gutaan sida ugu dhakhsaha badan;
- VI. Guddida Qandaraasyada waxaa lagu wargalinyaa inaanay bixin qandaraas aan lacagtiisu ku jirin miisaaniyadda dawladda isla markaana nooca qandaraas ee ay bixinayaan uu lahaado tilmaamo iyo shuruudo cad oo qeexaya sifaha qandaraaska la bixiyey kaas oo waafaqsan Qoondadda Miisaaniyadda ugu jirta.
- VII. Wasaaradaha iyo Haaya'daha dawladdu waxa laga codsanayaa inaanay la macaamilin ganacsade aan sidan warqadda cashuur la'aanta (**Tax Clearance Certificate**), iyo sumada lanbarka cashuur-bixiyaha (**Tax identification number**) ee ka soo baxday Waaxdda cashuuraha Berriga ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha.
- VIII. Wasaaradaha iyo Haaya'daha dawladda Waxa ka reebban qaadida wax dakhli ah oo aan sharcigu jideyn, Wasaaradda Maaliyadda ayaana qaranka uga mas'uula qabashada dakhliga.





7. Heerka Qasnadda.

Si la isugu dheeli tiro kharashka baxaya (outflow) iyo dakhliga soo xerooda (inflow), waxa Xisaabiyaha Guud lagu war-galinyaa in bil kasta uu Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha u soo gudbiyo heerka qasnaddu marayso, si looga shidaal qaato, looguna hago ogolaanshaha awoodaha kharash-galka (Expenditure warrant) ee soo maraya Waaxda Miisaaniyadda iyo Qorshaynta.

Wasaarad iyo Haaya'd kasta oo dakhli soo saar, oo odoroska Miisaaniyadana ku jirta, waxa lagu wargelinayaa in dakhli soo xarayntooda lagula xisaabtami-doono, Kharashyada ay soo codsadaana laga xanibi doono haddii dakhli ay qabteen ay soo xerayn waayaan.

8-Lacag-celinta (Refund of Revenue).

Dakhli kasta oo ku xerooday qasnadda dawladda dhexe oo dheeraad ah ama sharcigu u jideeyey cid gaar ah u celintiisa waxa loo raaci doonaa sidan hoos ku xusan:

- I. Haddii lacagtaas la qabtay sannad maaliyadeedka socda gudihiisa, waxa lacagta toos u celinaya Xafiiska Xisaabiyaha Guud, marka uu hubiyo in lacagtaasi ku xerootay qasnadda dawladda, isla markaana uu helo ogolaanshaha lacag celinta ee Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda iyo H.Dhaqaalah.
- II. Nuqulka rasmiga ah (Original receipt) ee lacagta la celinayo, waa in wajigiisa lagu qoraa "Waa la celiyey", laguna muujiyo Xaashida lacagcelinta (Payment voucher or Debit Memo) lambarkeeda.
- III. Lacagcelin lama sameyn karo haddii uu maqan yahay (Original receipt.) ama nuqulka laga soo caddeeyey meeshii laga jaray (true copy);
- IV. Haddii lacag-celintu la xidhiidho sanadihii hore, waxa lacagtaas celinteeda lagu ogolaan doonaa Awood kharash (Expenditure warrant) ah sannadka socda.

Annaga oo ku rajoweyn inaad sidaa ula socon doontaan naga guddooma salaan wacan.

Allah Mahad Leh.

Cabdilaahi Xasan Aadan
(Wasiirka)

5 | Page





TUSMADA BUUGGA

1. Hordhac.....	1
2. Xaaladda Dhaqaalaha Guud Ee Dunida	2
2.1 Soo kabashada dhaqaale ee Africa	3
3. Xaaladda Guud Ee Dhaqaalaha Somaliland.....	3
3.1 Wax-Soosaarka Dhaqaalaha Guud (GDP)	3
3.2 Hantaaqooyinka Guud ee ku yimid Dhaqaalaha Somaliland	5
3.3 Saamaynta Dhaqaale iyo Bulsho ee Dagaalka Ukraine - Somaliland	5
3.4 Saamaynta Caalamiga ah ee Xanuunka Safmarka ah ee COVID-19	5
3.5 Saamaynta Gubashadii Suuqa Wajaale	5
3.6 Gubashadii Suuqa Waaheen	6
4. Halbeegyada Dhaqaalaha.....	7
4.1 Sicir-bararka	7
4.2 Sarrifka Lacagta	8
4.3 Xawaaladdaha	9
4.4 Ganacsiga	10
4.4.1 Dhoofinta Xoolaha	10
4.4.2 Wax-Soodejinta	10
5. Shaqaalaysiinta Dawladda 2018 Ilaa 2025	12
6. Warbixinta Hab-Sami U Socodka Miisaaniyadda.....	13
6.1 Dakhli Uruurinta Jan-June 2024	13
6.2 Kharash-galka Dowladda Jan-June 2023	13
7. Siyaasada Miisaaninyada 2025	16
7.1 Siyaasada Mudnaanaha Miisaaniyadda	16
7.2 Siyaasadaha maaliyadeed ee kale	16
7.3 Siyaasadaha kor loogu qaadayo dakhliga	16
8. Guud Marka Odoraska Dakhliga 2025	17
8.1 Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2025	18
8.1.1 Odoroska Dakhliga Kastamada oo Deegamaysan 2025	20
8.1.2 Odoros-ka Dakhliga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2025 oo Deegamaysan	21
9. Faah-Faahinta Kharashka Miisaaniyadda 2025	23
9.1 Saamiga Wadaagayaasha ee Miisaaniyadda 2025	23



9.1.1 Ammaanka	24
9.1.2 Maamulka	24
9.1.3 Caafimaadka	25
9.1.4 Waxbarshada	26
9.1.5 Tamarta	26
9.1.6 Waxsoo-saarka	26
9.1.7 Deegaanka	27
9.1.8 Biyaha	27
9.1.9 Dhaqaalaha	27
9.1.10 Kaabayaasha Dhaqaalaha	28
9.1.11 Wadaagaha kale (cross-cutting Sector)	29
9.2 Soo Koobida Qeybaha Miisaaniyadda 2025	29
9.2.1 Kharashka Shaqaalaha	30
9.2.2 Karashka Alaabta & Adeegga Ama Hawl socodsiinta	30
9.2.3 Hantida Raagta	30
9.2.4 Kaalmooyinka & Daryeelka Bulshada ee Dawladdu Bixiso	31
9.2.5 Daynta Qaranka	31
9.3 Mashaariicda uu maalgalinayo Bangiga Adduunku Miis. Sanadka 2025	31
9.3.1 Mashruuca SERP	31
9.3.2 Mashruuca Abaar-tire (GW4R)	32
9.3.3 Mashruuca SESRP	32
9.3.4 Mashruuca FSRP	33
9.3.5 Mashruuca ERADIP	33
9.3.6 Mashruuca Damal Caafimaad	33
9.3.7 Mashruuca ISEGP	33
9.3.8 Mashruuca Barwaaqo	34
9.3.9 Labada Mashruuc ee Rajo Kaaba iyo E4HCD	34
9.3. 10 Mashruuca Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF)	34
10. Miisaaniyaddaha Dowladdaha Hoose Iyo Hay'addaha Macaashka	
Sameeya Ee 2025	35
10.1 Miisaaniyadda Hay'addaha Macaashka Sameeya ee 2025	35
10.2 Miisaaniyaddaha Dowladdaha Hoose ee 2025	36



Dakhliga Guud	38
Kharashka Guud	41
Mashaariicda Qaadhaan-bixiyeyaasha	42

Shaxda Miisaaniyadda Wasaaradaha & Hay'adaha 2025

Difaaca	50
Nabadgelyada	52
Ciidanka Asluubta	54
Ciidanka Booliska	56
Ciidanka Ilaalada Xeebaha	58
Ciidanka Socdaalka	60
Ciidanka Dab-Demiska Qaranka Somaliland	62
Wasaaradda Gaashandhigga iyo Difaaca	64
Difaaca	67
Wasaaradda H. Biyaha	69
Komishanka Qaranka ee Xakamaynta HIV/ AIDS	71
Wasaaradda H. Caafimaadka	75
Komishanka qaranka eeMihnadlayaasha caafimadka	76
Hay'adda Dhawrista Tayada	78
Hay'adda u Diyaargarowga Aafooyinka iyo Kaydka R.	80
Wasaaradda Degaanka & Is-bedelka cimilada	82
W.Qorshaynta & Horumarinta Qaranka	84
Wasaaradda Maaliyadda iyo H.Dhaqaalaha	86
Hay'adda Caymiska Qaranka	90
Wasaaradda Ganacsiga,Warshadaha iyo Dalxiiska	92
Hay'adda Aagga Cashuuraha ka Caaggan	90
Guddiga Qandaraaska Qaranka	96
Wasaaradda H. Maalgashiga	98
Wasaaradda Gaadiidka iyo H.Jidadka	100
Wasaaradda Igaadhsiinta iyo Tignoolojiyada	102
Wasaaradda Hawlaha Guud,Dhulka & Guriyaynta	104
Wasaaradda Duulista Hawada & H.Madaarada	106
Wasaaradda Madaxtooyadda	109
Golaha Guurtida JSL	112
Golaha Wakiilada JSL	114
Maxkamadda Sare	116
Max-kamadda Hoose	118
Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka	120



Hay'adda Shaqaalaha Dawladda	122
Macadka Shaqaalaha dawlada	124
Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka	126
Garyaqaanka Guud	128
W.Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah	130
Wasaaradda Cadaaladda &Garsoorka	132
Guddiga Xaquuqal Insaanka Qaranka	134
Wasaaradda Arrimaha gudaha & Amniga	136
Wasaaradda Xidh Golayaasha iyo Arimaha Distorka	138
Komishanka dib u habaynta shuruucda	140
Guddiga Doorshooyinka Qaranka	141
Gudida Maamulwanaaga iyo La-dagaalanka Mus	143
Guddida Diwaangalinta Ururada	145
Wasaaradda Dawladaha Hoose & H.Magaalooyinka	147
Wasaaradda Macdanta & Tamarta	149
Koomiishanka Tamarta	151
Wasaaradda Waxbarashada, Barbaarinta iyo Sayniska	153
Gudiga Tacliinta Sare	156
Wasaaradda H. Beeraha	158
Hay'adda Cilmibaadhista Beeraha	161
Wasaaradda Xanaanada Xoolaha & Horumarinta Miyiga	163
Wasaaradda Kalluumaysiga & Khayraadka Badda	166
W.Warfaafinta, Wacyigelinta iyo Dhaqanka	168
Wasaaradda Diinta & Awqaafta	170
Wasaaradda Shaqagalinta, A.Bulshada & Qoyska	173
Wasaaradda Ciyaaraha iyo Dhalinyarada	176
Wasaaradda Dib-u-dejinta iyo Arrimaha Bani-aadannimada	178
Jimciyadda Muj.Sooyaal	180



Liiska Shaxaha

Shaxda 2: IMF Kobaca Dhaqaalaha Iyo Sicir-Bararka Dunida 2023 - 2025	2
Shaxda 3: Saadaasha Baanka Adduunka ee dhaqaalaha Caalamka June 2024	3
Shaxda 4: Celceliska Sicir-Bararka, Jan – June, 2023 - 2024.....	7
Shaxda 5: Isbarbardhigga Xaddiga Sarrifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka Oo Saddex-Biloodle Ah Jan – June, 2023 - 2024.....	8
Shaxda 6: Lacagaha La Soo Diray Iyo Kuwa Laga Diray Somaliland, Jan – June, 2023 – 2024, oo Doolar ah (millions)	9
Shaxda 7: Is-barbardhigga Tirada Xoolaha Dhoofay, Jan- June 2023 - 2024	10
Shaxda 8: Qiimaha Alaabta Soo Degtay Jan-June 2023 – 2024	11
Shaxda 9: Shaxda korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda 2018-2025	12
Shaxda 10: Dakhli Ururinta Jan-June 2024.....	13
Shaxda 11: Soo koobida Qeybaha waaweyn ee Dakhliga 2025	18
Shaxda 12: Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2025	18
Shaxda 13: Ororoska Dakhliga Kastamada ee Miisaaniyadda 2025 oo Deegaamaysan	20
Shaxda 14: Odoroska Dakhliga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2025 oo Deegaamaysan	21
Shaxda 15: Soo Koobida Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miisaaniyadda 2025.....	23
Shaxda 16: Wadaagaha Amaanka iyo Difaaca.....	24
Shaxda 17: Wadaagaha Maamulka.....	24
Shaxda 18: Wadaagaha Caafimaadka	25
Shaxda 19: Wadaagaha Waxbarashada	26
Shaxda 20: Wadaagaha Tamarta	26
Shaxda 21: Wadaagaha Wax-soosaarka	26
Shaxda 22: Wadaagaha Deegaanka	27
Shaxda 23: Wadaagaha Biyaha	27
Shaxda 24: Wadaagaha Dhaqaalaha	28
Shaxda 25: Wadaagaha Kaabayaasha Dhaqaalaha.....	28
Shaxda 26; Wadaagayaasha Kale (Cross-Cutting Sector).....	29
Shaxda 27: Soo Koobida Qeybaha Waaweyn ee Kharashka Miisaaniyadda 2025	29
Shaxda 28: Liiska Mashaariicda uu Maalgalinayo Banngiga Adduunku Miisaaniyadda 2025.....	34
Shaxda 29: Soo koobista Miisaaniyadda Hay'addaha Macaashka Sameeya 2025	35
Shaxda 30: Miisaaniyadda Dawladaha Hoose ee 2025 oo Darajaysan	36



Liiska Jaantuusyada

Jaantus-ka 1: Wax-Soosaarka Guud Ee Dhaqaalaha Somaliland 2013-2022 Millions (GDP)	4
Jaantus-ka 2: Sicir-Bararka Qeybaha Waaweyn Oo Sanadle Ah (Sanadka Laga Duulayo 2012)	7
Jaantus-ka 3: Heerka Sarrifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka 2022 - Jan-June, 2024	8
Jaantus-ka 4: Wadarta Xoolaha Dhoofay Lix-biloodkii, 2023- 2024.....	10
Jaantus-ka 5: Qiimaha Alaabta Soo Degtay Jan 2022- June 2024 (SLSH)	11
Jaantus-ka 6: Jaantuus 6: Korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda 2018-2024	12
Jaantus-ka 7: Isbarbardhiga Qoondada Miisaaniyadda ee Jan-June 2023-2024.....	14
Jaantus-ka 8: Isbarbardhiga kharashka dhabta ah ee Jan-June 2023-2024	14
Jaantus-ka 9: Isbarbardhiga Qoondada Miisaaniyadda ee Qeybaha Miisaaniyadda Jan-June 2023-2024.....	15
Jaantus-ka 10: Soo Koobida Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2025.....	20
Jaantus-ka 11: Saamiga Goog waliba ka tahay wadarta guud ee Cashuurha Berriga Miisaaniyadda 2024 ...	22
Jaantus-ka 12: Isbarbardhiga Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miis 2024 iyo 2025.....	23
Jaantus-ka 13: Soo Koobida Saamiga Qeybaha Miisaaniyadda 2025	30
Jaantus-ka 14: Miisaaniyadda Hay'adaha Macaashka sameeya ee 2025	36
Jaantus-ka 15: Isbarbar-dhiga Darajooyinka Dawladaha Hoose ee 2024-2025	37
Jaantus-ka 16: Darajooyinka Dawladaha Hoose ee Miisaaniyadda 2025.....	37

Lifaaqyada:

Lifaaqa 1aad: Tacriifadaha	181
Lifaaqa 2aad: Liiska Mashaariicda & Hantida Raagta	187
Lifaaqa 3aad: Mashaariicda Biyo Ballaadhinta	190



1. HORDHAC

Miisaaniyadda 2025-ku waxay ka kooban tahay:

1. Miisaaniyadda Dawladda Dhexe
2. Miisaaniyadda Hay'adaha Madaxa-banaan
3. Miisaaniyadda Dowladdaha Hoose
4. Mashaariicda Qaandhaan-bixiyeyaashu inagu caawiyaan

Mashaariicda ay maalgeliyaan haayadaha caalamiga ah ee sanadkan 2025 miisaaniyadda Kujira waxaa ka mid ah Mashruuca SERP ee W/Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mashruuca Damal Caafimaad ee Waasaaradda Horumarinta Caafimaadka, Mashruuca FSRP ee Wasaaradda Beeraha, Mashruuca Abaartire ee Wasaarada Horumarinta Khayraadka Biyaha, Mashruuca Barwaaqo ee Wasaaradda Qorshaynta Qaranka, Mashruuca SESRP ee Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta, Mashruuca EARDIP ee Wasaaradda Tiknoolajiyada iyo Isgaadhsiinta, labadda mashruuc ee RAJO KAABA iyo E4HCD ee Wasaaradda Waxbarashadda iyo Barbaarinta Caruurta oo dhammaantood uu maalgelinaayo Baanka Adduunku, Mashruuca ISEGP ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha oo uu maalgelinayo Baanka Horumarinta Afrika iyo Mashruuca Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF) oo ay maalgelinayaan wadamo kala duwani.

Isugeynta guud ee Miisaaniyadda sanadka 2025-ku waa **3,926,600,644,363 SL\$**, sida Shaxda hoose ka muuqata. Miisaaniyadda dawladda dhexe waa **2,575,931,251,888 SL\$** taas oon wax badan ka bedelneyn tii sannadkii hore ee 2024-ka.

Shaxda 1: Soo Koobida Shaxda guud ee Miisaaniyadda Qaranka ee Sannadka 2025

Faah-faahinta	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Isbeddelka (%)	Saamiga Guud
Miisaaniyadda Dowladda Dhexe	2,530,336,471,858	2,575,931,251,888	45,594,780,030	1.80%	65.6%
Miisaaniyadda Dowladdaha Hoose	589,899,197,085	570,297,669,257	-19,601,527,828	-3.3%	14.5%
Miisaaniyadda Hay'addaha Macaashka Sameeya	277,792,895,534	273,633,516,978	-4,159,378,556	-1.5%	7%
Miisaaniyadda Mashaariicda Baanka Aduunka iyo Baanka H.Afrika	100,816,451,400	506,738,206,240	405,921,754,840	403%	12.9%
Isugeynta Guud	3,498,845,015,877	3,926,600,644,363	395,617,263,486	11.3%	100%

Fiiro gaar ah: Mashruuca EARDIP ee Wasaaradda Tiknoolajiyada iyo Isgaadhsiinta lacagtiisuna dhan tahay **32,138,365,000 SL\$** oo ku jiray buugga miisaaniyadda ayaa ka maqnaa isu-gaynta guud ee miisaaniyadda kaas oo hadda Golaha Wakiiladu dib ka soo saxeen (Supplementary Budget) ahaan.



2. XAALADDA DHAQAALAHA GUUD EE DUNIDA

Dhaqaalaha guud ee dunida waxa beryahan danbe soo wajahayay caqabado badan oo is-xigxiga. Caqabadahaasi waxa ay ka soo bilaabmeen Caabuqii-Covid-19, Dagaalka Yukrayn iyo xaaladda dagaalka xuutiyaanta ee ka soo cusboonaatay Badda-Cas, kuwaas oo sababay wax-soosaarkii dunida iyo isusocodkii badeecadaha oo yaraaday. Si kastaba ha ahaatee sanadkan 2024-ka iyo sanadka inagu soo foolka leh ee 2025-ka waxaa suurtoagal ah in caqabadahaasi yaraadaan laakin lama hubo sida looga soo wada kaban doono. Celcelis ahaan, Hay'adda Lacagta Adduunka ee (IMF) waxa ay saadaalinaysaa in dhaqaalaha dunidu kobci doono 3.3% sanadka soo socda ee 2025-ka. Dhinaca kale hay'addu waxa ay saadaalisay in sicir-bararka laga soo kaban doono, isaga oo hoos udhici doonaa 2.9% Wadamada Saxaraha Ka hooseeya.

Sidoo kale, qiimeyntii ugu dambeysay ee uu sameeyay Baanka Adduunka ee ku saabsanyd saadaasha dhaqaalaha caalamka ayaan wax badan ka duwanayn ta ay Hay'adda Lacagta Adduunka samaysay., Baankaa adduunka wuxu saadaaliyay in kobaca dhaqaalaha caalamku kordhi doono 2.6% sanadka 2024, halka 2.7% uu kordhi doono 2025.

Maadaama dunidu dhaqaale ahaan iskuwada xidhan tahay, guud ahaan dhaqaalaha dunida ee sanadahan danbe hoos-u-dhacaayay waxa uu keenay hantaaqooyin dhaqaale oo badan (Economic Shocks) kuwaas oo saamayn taban ku yeeshay dhaqaalaha Somaliland.

Somaliland dhaqaalaheedu waxa uu aad ugu xidhan yahay ganacsiga, gaar ahaan wax-soo-dejinta kaas oo saamayn xoogan oo tabani ka soo gaadhay isbedellada dhaqaale ee dunida kka dhacay.

Hase ahaatee, sida ka muuqata shaxda hoose, wadamada dhaqaalahoodu soo korayo ayaa noqon doona kuwa ugu badan ee samaynaya kobaca dhaqaale. .

Shaxda 2: IMF Kobaca Dhaqaalaha Iyo Sicir-Bararka Dunida 2023 - 2025

	Kobaca Dhaqaala Dhabta ah (%) (Real GDP Growth, %)			Sicir-bararka oo Sanadle ah (%) (Annual Inflation, %)		
	2023	2024 ^{Qiyas}	2025	2023	2024	2025
Wadamada Hore-U-Maray	1.6	1.7	1.8	7.3	4.6	2.6
Aasiya	5.6	5.2	4.9	2.4	2.4	2.8
China	5.2	4.6	4.1	0.2	1.0	2.0
India	7.8	6.8	6.5	5.4	4.6	4.2
Bariga Dhexe Ee Aasiya	2.0	2.8	4.2	16.7	15.5	11.8
Saudi Arabia	-0.8	2.6	6.0	2.3	2.3	2.0
UAE	3.4	3.5	4.2	1.6	2.1	2.0
Wadamada Saxaraha Ka Hooseeya	3.4	3.8	4.0	16.2	15.3	12.4
Ethiopia	7.2	6.2	6.5	30.2	25.6	18.2
Kenya	5.5	5.0	5.3	7.7	6.6	5.5
Djibouti	7.0	6.5	6.0	1.8	1.8	1.9
Somalia	2.8	3.7	3.9	6.1	4.8	3.9

IL-Wareed: Hay'adda Dhaqaalaha Dunida (IMF)



Shaxda 3: Saadaasha Baanka Adduunka ee dhaqaalaha Caalamka June 2024

	2023	2024	2025
ADDUUNKA	2.6	2.6	2.7
WADAMADA DHAQAALAHODU HORUMARAY	1.5	1.5	1.7
WADAMADA DHAQAALAHODU SOOKORAAYO	4.2	4.0	4.0
WADAMADA SAXARAH AFRICA KA HOOSEEYA	3.0	3.5	3.9
WADAMADA DHAQAALAHODU LIITO	3.8	5.0	5.3

2.1 Soo kabashada dhaqaale ee Africa


Ka dib afar sano oo dhibaatooyin ah, rajada dhaqaalaha ee Africa gaar ahaan wadamada saxaraha ka hooseeya ayaa si tartiib ah u soo kabanaya. Koboca dhaqaalaha ayaa la filayaa inuu ka kici doona 3.4% uu ahaa sanadka 2023 kaas oo la filayo inuu gaadho 3.8% sanadka 2024, iyada oo ku dhawaad saddex- meelood laba ay filayaan koboc dhaqaale oo intaa ka sarreeya. Soo kabashada dhaqaalaha ayaa la filayaa inay sii socoto sanadaha soo socda, iyada oo saadaasha koboca Dhaqaale ay gaadhi doonto 4.0 boqolkiiba sanadka 2025. Sidoo kale, sicir-bararku wuxuu ku dhow yahay inuu kala bar noqdo, heerarka deynta Wadamada Africa ayaa si guud u xasilay, dhowr waddanina waxay dhowaan soo saareen Eurobonds, iyagoo soo afjaray laba sano oo hakad ah oo ka jiray suuqyada caalamiga ah.

Si kastaba ha ahaatee, dhammaan arrimuhu ma aha kuwo wada wanaagsan, waxaana jira khataro badan oo ku xeeran saadaasha mustaqbalka. Weli waxaa taagan culeyskii dhinaca maalgelinta, iyadoo dowladaha gobolku ay la tacaalayaan hoos u dhaca ku yimid maalgelinta, sare u kaca kharashaadka deyn qaadashada, iyo dib u bixinta deymaha lagu leeyahay. Iyadoo ay jiraan caqabadahaa aan kor ku soo sheegnay, dalalka saxaraha ka hooseeya waxay u baahnaan doonaan taageero dheeri ah oo ka timaadda bulshada caalamka si ay uga dhabeeyaan dhaqaale waara iyo mustaqbal wanaagsan.

3. XAALADDA GUUD EE DHAQAALAH A SOMALILAND

3.1 Wax-Soosaarka Dhaqaalaha Guud (GDP)

Sada ay tilmaamayso war-bixinta sanadlaha ah ee ay soo saarto Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka Somaliland, Wax-soosaarka Dhaqaalaha Guud ee Somaliland ee loo yaqaano (GDP) ayaa laga arki karaa korodh ku yimi sanadkii 2023 ka kolka loo eego sanadkii ka horeeyay ee 2022 ka marka laga cabbiro xagga koboca dhaqaalaha caadiga ah ee aan la tixgelin sicir-bararka (Nominal GDP). Sanadkii 2023 ka waxa uu dhaqaalaha guud ee Somaliland noqday 3,977 million Doolar halka uu sanadkii 2022 ka ahaa 3,571 million Doolar. Inta dhaqaalaha qofkiiba ku soo hagaagaysaa waxa ay ahayd sanadka 2023 ka 871 Doolar sanadkii (Nominal Per Capita Income), halka uu 804 Doolar ka ahaa sanadkii 2022 ka. Hase yeeshee, marka laga cabbiro Wax-soosaarka Dhaqaalaha Guud iyada la tixgelinaayo sicir-bararka (Real GDP) waxa uu tilmaamayaa in sanadka 2023 ka uu ahaa dhaqaaluhu 2,497 million Doolar halka uu ka ahaa 2,419 million Doolar sanadkii 2022. Sanadka 2023 ka waxa uu tilmaamayaa in uu jiray kor-u-dhac 3.2% ah. Inta dhaqaalaha qofkiiba ku soo hagaagaysaa waxa ay ahayd sanadka 2023 ka 547 Doolar sanadkii (Real Per Capita Income), halka uu 545 Doolar ka ahaa sanadkii 2022 ka.



Jaantus-ka 1: Wax-Soosaarka Guud Ee Dhaqaalaha Somaliland 2013-2022 Millions (GDP)

IL-Wareed: Wasaaradda Qorshaynta Qaranka Somaliland 2023



3.2 Hantaaqooyinka Guud ee ku yimid Dhaqaalaha Somaliland

Somaliland Caalamka intiisa kale ayay kaga xidhan tahay dhinaca dhaqaale. Hoos-u dhaca dhaqaale ee dunida ku yimid ee ay keeneen safmarka caabuqa COVID-19, Dagaalka Ruushka iyo Ukrain, abaaraha soo noqnoqday iyo gubashadii Suuqyada Waaheen iyo Wajaale oo Somaliland u gaar ahaa waxay dhammaantood saamayn taban oo dhaqaale ku yeesheen wadanka. Saamaynaha dhaqaale ee ay ku yeesheen dhaqaalaha maxalliga ah waxa ka mid ah; ganacsiga oo is dhima, xawaaladaha oo hoos u dhacay, sicir-barar, cunto yaraan iyo dakhliga dawladda oo yaraaday IWM. Fahamka iyo saamaynta hantaaqooyinkani muhiim ayey u yihiin saadaalinta doorsoomayaasha dhaqaalaha guud iyo xulashada siyaasado Maaliyadeed iyo Lacageed ee muddada dhexe oo hufan oo meelmar noqon kara laguna xakamayn karo dhibaatooyinka dhaqaale.

3.3 Saamaynta Dhaqaale iyo Bulsho ee Dagaalka Ukraine - Somaliland

Maalgashiga Somaliland ee ganacsiga caalamiga ah waxa uu noqday mid dhaawac ka soo gaadhay dhaqaalaha caalamka. Ku-tiirsanaanta badeecadaha la soo dejiyo iyo qulqulkii badeecadaha oo yaraaday ayaa sababay hoos u dhac ku yimid dhanka ganacsiga Jamhuuriyadda.

Saameynta kale ee la filayo ayaa ah inay yaraato gargaarka laga filayey wadamada Qaadhaan bixiyayaasha. Wadamada qaadhaan bixiyayaasha ayaa lacag Miisaaniyad kabis ah u qoondeeyey Wadanka Ukrain, taa bedelkeeda waxa la filayaa inay yareeyaan gargaarkii ay siinjireen wadamada soo koraya oo Somaliland kujirto, sababi kartaa inay yaraato caawimadii ay Somaliland ka heli jirtay Caalamka.

3.4 Saamaynta Caalamiga ah ee Xanuunka Safmarka ah ee COVID-19

Laga soo bilaabo dabayaaqadii Sannadkii 2019, safmarka caabuqa COVID-19 waxa uu caalamka ku hayey khasaare nafeed iyo mid dhaqaale oo sii kordhaya iyada oo **770 million** oo qof laga helay cudurka, in ka badan **7 million** oo dhimasho la diiwaangeliyey ilaa hadda. Badbaadinta nolosha dadka iyo ka-diyaargarowga caafimaad waxa ay keliftay in karantiimooyin la sameeyo, la kala fogaado, lana xidho ganacsiyo badan. Tallaabooyinka lagu xakamaynayo cudurka ee dunidu qaadatay waxa ay culays laxaad leh saareen dhaqaalihii iyada oo ay kala gooyeen qulqulkii ganacsiga, dakhligii yaraaday, shaqo la'aani timid, ganacsiyadii oo xidhmay, dakhligii dawladda oo hoos u dhacay ama laga leexiyey meelihii horumarinta loogu talo galay.

3.5 Saamaynta Gubashadii Suuqa Wajaale

Waxa iyana sanadkii 2023 soo kordhay khasaare kale oo ah gubashadii suuqii weynaa ee ku yaalay magaalo ganacsiyeedka Wajaale. Suuqa Wajaale waxa uu ahaa suuq- gacansiyeed weyn, kaas oo u adeega iskuna-xidha guud ahaan Somaliland iyo dalka aynu jaarka nahay ee Itoobaya. Suuqani waxa uu aad saamayn weyn oo dhaqaale ugu leeyahay guud ahaan dhaqaalaha Somaliland.

Masiibadan gubasho ee dhacday waa mid si dadban iyo si toosaba saamaynteedu u taabatay qoysas badan oo ka mid ah dadweynaha reer Somaliland iyo guud ahaan Dhaqaalaha dalkaba.

Qiyaaso hor-dhac ah oo laga sameeyay Khasaaraha ka dhashay gubashadii suuqa wajaale waxa lagu qiyaasay inay ku gubatay hanti gaadhaysa 5 ilaa 6 milyan oo Dollar, kuna burbureen ilaa 74 Meheradood. Waxa kale oo



ku shaqo beelay shaqaale tiro badan oo gaadhaya ilaa 300 oo ka shaqaynayay meheradaha gubtay ee suuqa Wajaale.

3.6 Gubashadii Suuqa Waaheen

Soo kabashadii la filayey inuu sameeyo dhaqaaluhu ka dib Covid-19, waxa markale soo wajahday masiibo kale oo baaxadleh oo ah gubashadii Suuqii weynaa ee Waaheen.

Suuqa waaheen wuxu ahaa suuq gacansiyeedka ugu weyn Somaliland, kaas oo u adeegi jiray guud ahaan Somaliland iyo Dalalka jaarkaba.

Masiibadan aan la filaynin waa mid si dab-ban iyo si toosa saamaynteedu u taabatay qoys kasta oo ka mid ah Somaliland.

Qiyaaso hor dhaca oo laga sameeyay Khasaaraha ka dhashay Gubashadii suuqa waaheen waxa lagu qiyaasay inay ku burburtay hanti gaadhaysa 1.5 ilaa 2 bilyan dollar, taas oo lagu qiyaasay inay 40% ka tahay wax soo saarka guud ee Gudaha (GDP), kuna burbureen ilaa 5,000 oo Meheradood.



4. HALBEEGYADA DHAQAALAHA


4.1 Sicir-bararka

Sida ay tilmaamayso Shaxda hoose oo laga diyaariyay war-bixinta billaha ah ee tilmaamaha qiimaha qutaha (Consumer Price Index, CPI) ee ay soo saarto Wasaaradda Qorshayta Qaranka Somaliland , guud ahaan sicirka alaabaha kala duwan ee dalka waxaa jiray hoos-u-dhac lixdii bilood ee hore ee sanadkan 2024^{ka} (Jan-June) marka loo eego lix-biloodkii sanadkii hore ee 2023^{ka} (Jan-June). Celcelis ahaan Lix-biloodkii hore ee sanadkan 2024^{ka} sicir-bararku waxaa uu hoos ugu soo noqday 9.7% marka loo eego lix-biloodkii kal-hore (2023) oo uu ahaa 10.2%. Waxaa ka muuqata war-bixinta in lix-biloodkii hore ee sanadkan 2024^{ka} (Jan- June), guud ahaan sicirka alaabaha kala duwan ee dalku ay wanaagsanaayeen marka loo eego lix-biloodkii sanadkii hore ee 2023^{ka} (Jan-June).

Shaxda hoose waxa ay tilmaamaysaa celceliska isbedel ee xaddiga sicir-bararka oo isbarbardhig lagu sameeyay si lix-biloodle ah sanadaha 2023^{ka} iyo 2024^{ka}.

Shaxda 4: Celceliska Sicir-Bararka, Jan – June, 2023 - 2024

Sadex-Biloodka	Sicir-Bararka Alaabta Guud (Headline)		Sicir-Bararka Aanay Ku Jirin Cuntada iyo Tamartu (Core)		Cuntada Iyo Wixii la Xidhiidha (Food Crops & Related Items)		Tamarta, Shiidaalka& Biyaha iwm (Energy, Fuels & Utilities, EFU)	
	2023	2024	2023	2024	2023	2024	2023	2023
Celcelis	10.21%	9.75%	8.72%	6.47%	15.5%	21.4%	16.5%	5.6%



Jaantus-ka 2: Sicir-Bararka Qeybaha Waaweyn Oo Sanadle Ah (Sanadka Laga Duulayo 2012)

IL-Wareed: Wasaaradda Qorshaynta Qaranka Somaliland 2024




4.2 Sarrifka Lacagta

Marka la qiimeeyo celcelis ahaan qiimaha sarrifka Lacagta shillingka Somaliland iyo doolarka ee lix-biloodkii hore ee sanadkan 2024^{ka} waxaa u ahaa 8,867 SLSh, halka uu ka ahaa sarrifku lix-biloodkii sanadkii hore ee 2023^{ka} ahaa 8,581 SLSh. Taas uu tilmaamaysa in qiimaha shilling ka Somaliland uu hoos u dhacay lix-biloodkii hore ee sanadkan 3.3% marka loo eego lix-biloodkii sanadkii hore ee 2023^{ka}. Dhinaca kale rubuclaha saddexaad ee sanadkan 2024 waxaa jirta in qiimaha shilling ka Somaliland uu weli hoos u sii dhacayo ilaa uu gaadhay celcelis ahaan 9500 marka la eego suuqa sarrifka Somaliland. Waxa jira dedaalo uu wado Baanka Somaliland oo kaashanaya Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda iyo daneeyayaasha kale oo la rabo in wax lagaga qabto kor-u-kaca sarifka shillingka Somaliland iyo doolarka si loogu soo celiyo meeshii dhexdhexaadka ahayd ee 8,000 ilaa 8,500 SLSH/Dollar, oo ah siyaasadda bangiga Somaliand ee maamulidda sarrifka Lacagta.

Shaxda 5: Isbarbardhigga Xaddiga Sarrifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka Oo Saddex-Biloodle Ah Jan – June, 2023 - 2024

Sadex-biloodka (Celcelis)	2023		2024		Isbedelka Sanadlaha ah
	Sarrifka	%	Sarrifka	%	
Saddex-biloodka 1 ^{aad}	8,563	0.59%	8,850	0.56%	3.4%
Saddex-biloodka 2 ^{aad}	8,600	0.43%	8,885	0.39%	3.3%
Celcelis	8,581		8,867		3.3%

IL-Wareed: Baanka Dhexe Ee Somaliland, 2024



Jaantus-ka 3: Heerka Sarrifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka 2022 - Jan-June, 2024



4.3 Xawaaladdaha

Iyada oo laga duulayo xogta laga soo uruuriyey baananka iyo Xawaaladaha ku yaala Somaliland, waxa ay sheegaysaa in lacagaha la soo xawilay lix-biloodkii hore ee sanadkan 2024^{ka} ay ka badan yiniin 12% marka loo eego lacagihii la soo xawilay lix-biloodkii hore ee sanadkii 2023^{ka}. Dhinaca kale lacagaha dalka laga xawilay waxa ay iyaguna hoos-u-dhaceen 21% sanadkan 2024^{ka}, marka loo eego lacagihii la xawilay lix-biloodkii hore ee sanadkii 2023^{ka}.

Shaxda 6: Lacagaha La Soo Diray Iyo Kuwa Laga Diray Somaliland, Jan – June, 2023 – 2024, oo Doolar ah (millions)

Bisha	Lacagta La Soo Diray			Lacagta La Diray		
	2023	2024	Isbedel (%)	2023	2024	Isbedel (%)
Jan	\$ 88.0	\$96.8	9.98%	\$284.3	\$ 211.2	-25.73%
Feb	49.0	92.2	88.34%	199.0	169.3	-14.94%
Mar	100.0	104.5	4.57%	219.9	210.8	-4.13%
Wadarta 1 ^{aad}	\$237.0	\$293.6	24%	\$703.3	\$591.3	-16%
April	98.4	96.5	-1.96%	263.86	198.2	-24.88%
May	99.9	99.8	-0.13%	246.72	191.8	-22.26%
Jun	95.1	103.1	8.4%	241.95	170.7	-29.45%
Wadarta 2 ^{aad}	\$293.5	\$299.4	2%	\$752.53	\$560.7	-25.49%
Wadarta Guud	\$530.5	\$593.0	12%	\$1,455.83	\$1,152.0	-21%

IL-Wareed: Baanka Dhexe Ee Somaliland


4.4 Ganacsiga

4.4.1 Dhoofinta Xoolaha

Tirada xoolaha ee dhoofay lix-biloodkii hore ee sanadkan 2024-ku, waxa ay dhammayd 2,690,899 neef, waxay 16% ka badan yihiin tiradii xoolaha ee dhoofay lix-biloodkii hore ee sanadkii 2023-ka oo ahaa 2,317,592 neef. Sida uu tilmaamaayaan shaxdan iyo jaantuska hoose, idaha iyo riyaha ayaa markasta ugu badan xoolaha Somaliland laga dhoofiyo. Intii u dhaxaysay bilihii January iyo June 2023 ka, xoolihii dhoofay oo ahaa 2.3 milyan, idaha iyo riyihu waxa ay ka ahaayeen 94% halka ay sanadkan 2024 ka xiligaas oo kale ka ahaayeen 93%.

Shaxda 7: Is-barbardhigga Tirada Xoolaha Dhoofay, Jan- June 2023 - 2024

Xoolaha	2023	2024	Faraqa	Isbedelka (%)
Geela	43,970	73,956	29,986	68%
Lo'da	94,537	117,582	23,045	24%
Idaha & Riyaha	2,179,085	2,499,361	320,276	15%
Wadarta	2,317,592	2,690,899	373,307	16%



Jaantus-ka 4: Wadarta Xoolaha Dhoofay Lix-biloodkii, 2023- 2024

IL-Wareed: W/H/Maaliyadda /Waaxda Kastamada

4.4.2 Wax-Soodejinta

Guud ahaan sida ay tilmaamayaan shaxda iyo jaantuska hoose, lix-biloodkii hore ee sanadkan 2024^{ka} waxa jira kor-u-kac ah 5% marka loo eego qiimaha alaabta soo degtay lix-biloodkii hore ee sanadkii 2023^{ka}. Qiimaha alaabta soo degtay lix-biloodkii hore ee sanadkan 2024^{ka} waxa ay dhammayd **4.396¹** Tirilyan SISH, halka ay lix-biloodkii sanadkii hore ee 2023^{ka} ka ahayd **4.177** Tirilyan SISH. In kasta oo lix-biloodka sanadkan uu jiray kor-u-kac aan badnayn hadana soodejinta alaabtu weli uu uu hooseeyaa marka loo eego sanadihii hore. Hoos-u-dhacaas waxa lagu sababayn karaa saamayn ka timi xagga wax-soosaarka iyo isugudubka alaabihi dunida oo yaraaday, dhinaca kalena qaaliyoobay iyada oo ay saamayn weyn ku leedahay arintan dagaalka dabo-


¹ Qiimaha Alaabta Waxa Lagu Saleeyay Qiimo Sheegta (Invoice Value) Ay Keenaan Ganacsatadu.



dheeraaday ee ka socda dalka Yukrayn, dagaalka xuutiyiinta ee badda-cas ka soo cusboonaaday iyo xaaladaha dhaqaale xumo iyo amni ee ka jira dalalka aynu jaarka nahay.

Shaxda 8: Qiimaha Alaabta Soo Degtay Jan-June 2023 – 2024

Saddex-Biloodka	2023	2024	Faraqa	Isbedelka (%)
Rubuca 1 ^{aad}	2,226,633,239,379	2,200,906,683,463	-25,726,555,916	-1%
Rubuca 2 ^{aad}	1,950,514,526,125	2,195,814,666,416	245,300,140,291	13%
Wadar	4,177,147,765,504	4,396,721,349,879	219,573,584,375	5%



Jaantus-ka 5: Qiimaha Alaabta Soo Degtay Jan 2022- June 2024 (SLSH)

IL-Wareed: W/H/Maaliyadda /Waaxda Kastamada



5. SHAQAALAYSIINTA DAWLADDA 2018 ILAA 2025

Sida ka muuqata Shaxda 8aad, Laga soo bilaabo 2018 tirada Shaqaalaha Dowladda Dhexe waxa ku kordhay **11,060** oo qof, una dhiganta **(64%)**, marka la eego cel-celiska (Average) tirada shaqaaluhu kordhayeen lixdii sano ee u dambaysay waxay ahayd **(9.14%)**.


Tani waxa ay ka tarjumaysaa inay dawladdu noqotay shaqaaleeyaha ugu weyn ee wadanka, sidoo kale waxay astaan u noqon kartaa in adeegyadda bulshadda la siinaayay ay kordhaayeen muddadaa.

Korodhka tirada shaqaalaha meelaha laga xusi karo waxa ka mid ah:

- Mashruuca Shaqo qaran
- Shaqaalaysiintii shaqaalihii ku meel gaadhka ahaa ee Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladda
- Kordhinta shaqaalaha Caafimaadka
- Kordhinta shaqaalaha Waxbarashada (macalimiinta)

Shaxda 9: Shaxda korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda 2018-2025

Sannadka	Shaqaalaha	Isbedelka %
2018	17,240	
2019	18,838	9%
2020	20,805	10%
2021	23,686	9%
2022	24,508	3.40%
2023	26,800	9%
2024	27,800	4%
2025	28300	1.7%



Jaantus-ka 6: Jaantus 6: Korodhka Tirada Shaqaalaha Dowladda 2018-2024

Il wareed: Wasaaradda H.Maaliyadda



6. WARBIXINTA HAB-SAMI U SOCODKA MIISAANIYADDA

6.1 Dakhli Ururinta Jan-June 2024

Laga soo bilaabo January ilaa June 2024, dakhliga guud ee soo xarooday wuxu dhamaa 1.14trilyan SLSH, kaas oo ka kala yimid labada qaybood ee kala ah: Kastamada iyo Cashuuraha Berriga.

Waaxda Cashuuraha Berriga ayaa soo xarasay ku dhawaad 310billion SLSH, taas oo ka turjumaysa inay soo saareen 3.5bn SLSH dheeraada marka la barbardhigo 307bn slsh loo odorasay inay soo saaraan una dhigan boqolay ahaan 1.2% dheeraada.

Dhanka kale, waaxda Kastamada ayaa soo ururiyay dakhli dhan 829bn SLSH marka loo eego ku talagalkii dakhli ee laga rabay oo ahaa 958bn SLSH, taas oo muujinaysa hoos u dhac ah 128bn SLSH ama 13%.

Sidoo kale, marka la isbarbardhigo labada lixbood ee Jan-june 2023 iyo 2024, waxa muuqata in dakhli ururintu ka hoosayso waxoogaa tii sanadkii hore.

Dakhliga guud ee soo xarooday jan-june 2024 wuxu ahaa 1.141trilyan SLSH, halka uu ka ahaa 1.146 isla wakhtigaa wakhtigeedii

Shaxda 10: Dakhli Ururinta Jan-June 2024

Waaxda	Kutalo galka Jan-June 2024	Dakhliga dhabta ah Jan-June 2024	Faraq	Isbedelka boqolayda
Inland Revenue	307,120,362,800	310,684,186,057	3,563,823,257.29	1.16%
Customs	958,047,739,597	829,827,846,940	-128,219,892,657.00	-13.3%
Grand Total	1,265,168,102,397	1,140,512,032,997	-124,656,069,399.71	-10%

6.2 Kharash-galka Dowladda Jan-June 2023

Lix biloodkii hore ee sanadkan 2024 dawladdu waxay kharashgaraysay 1.02trillion slsh, taas oo ka dhigan 40.27% Miisaaniyad guud ee Dowladda Dhexe oo ahayd SLSh 2.53 trillion.


Si kastaba ha ahaatee, kharashka dhabta ah ayaa hoos uga dhacay qaddarkii loo qoondeeyay lix biloodka hore (13%) ama 134bn SLSH, taas 13.2 bn SLSH ama 1.3% ka yar kharash-galkii lix biloodkii sannadkii hore ee 2023.

Inta badan wadaagayaasha uu ka koobanyahay kharashaadku ayaa muujinaaya hoos u dhac marka laga reebo Nabadgelyada iyo Maamulka, taas oo ka timid xannibaadihii kharash-bixineed ee la hirgeliyey rubucii labaad ee sanadkan 2024-ka si la isugu dheeli tiro dakhliga iyo kharashka maadaa odoraskii dakhligu ka hoos maray bartilmaameedkii loo dhigay.

Jaantuuska hoose waxa uu muujinayaa hoos u dhaca ku yimid badiba wadaagayaasha uukharashaadku ka koobanyahay.




Isbarbardhiga Qoondada Miisaaniyadda ee Jan-June 2023-2024



Jaantus-ka 7: Isbarbardhiga Qoondada Miisaaniyadda ee Jan-June 2023-2024


Kharashgalka dhabta ah Jan-June 2023-2024



Jaantus-ka 8: Isbarbardhiga kharashka dhabta ah ee Jan-June 2023-2024



Qoondada Miisaaniyadda oo qeyb-Qeybsan



Jaantus-ka 9: Isbarbardhiga Qoondada Miisaaniyadda ee Qeybaha Miisaaniyadda Jan-June 2023-2024



7. SIYAASADA MIISAANINYADA 2025

7.1 Siyaasada Mudnaanaha Miisaaniyadda

Iyada oo laga duulayo sidii kor loogu qaadi lahaa baahiyaha aasaasiga ah ee Bulshada iyo dhanka horumarka ayaa guddida dejinta siyaasada Miisaaniyadda qaranku waxay qorsheeyeen Mudnaanaha siyaasada Miisaaniyadda Qaranka ee sanadka 2025 kuwaas oo waafaqsan qorshaha horumarinta qaranka waana sidan hoos ku xusan:

1. Maamulka (Amniga iyo Garsoorka)
2. Waxbarashada
3. Biyaha
4. Wax-soo saarka
5. Deegaanka
6. Kaabayaasha Dhaqaalaha
7. Caafimaadka
8. Tamarta

7.2 Siyaasadaha maaliyadeed ee kale

Waxaa muddo dheer soojiray in dawladda Somaliland ay miisaaniyadeeda ku darsan jirtay qoondo lacageed oo loogu talagalay mashaariicaha horumarineed. Mashaariicaha horumarineed waxay badanaa ahaayeen qaar ku fiiqsan wasaaradaha iyo haaya'daha dawladda dhexdooda oo sida loo fuliyo iyo dabagalkooduba hooseeyay. Sidaa daraadeed Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaaluhu iyadoo tixgelinaysa Qorshaha Horumarinta Qaranka, iyadoo eegaysa barmaamijka siyaasadda xukuumadda cusub, sidoo kalana tixgelinaysa mudnaanaha miisaaniyadda ee Guddidada Siyaasadda Miisaaniyadda iyo Guddi-hoosaadka Dhaqaalaha iyo Ganacsiga ee Golaha Wakiiladdu dejiyeen waxay meel ku ururisay qayb ka mid ah kharashkii loo qoondeeyay mashaariicaha horumarineed ee wadanka (projects pooling fund), taas oo loo qoondeeyey lacag dhan **54,000,000,000 SLSH** kuna hoos jirta Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha.

7.3 Siyaasadaha kor loogu qaadayo dakhliga

Badiba cashuuraha ku xusan xeerka dakhliga ee 2016 ayaa inta badan la dhaqan galiyay hadda. Dakhli uruurinta iyo u hogaansanaanta sharciga ayaa marba marka ka dambaysay la horumarinayay, gaar ahaan cashuuraha waaweyn.

Saamiga Cashuuruhu ka yihiin wax-soosaarka guud ee gudaha (GDP) ayaa la hiigsanayaa inuu gaadho (14%) dhammaadka sanadka 2028 halka uu hadda ka yahay (10%), taa si loo gaadho waxa loo baahan yahay dib u habayn iyo dadaalo dheeraada oo lagu sameeyo dakhli uruurinta.

Waana kuwan hoos ku xusan Siyaasadaha u qorshaysan Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda ee lagu horumarinayo dakhli uruurinta sanadka 2025

1. Horumarinta u hogaansanaanta sharciga cashuuraha iyo fulinta
2. Samaynta daraasad la xidhiidha sidii looga guura lahaa habka cashuur uruunta ee ku salaysan (flat rate based) loona guura lahaa nidaamka cashuur bixinta ee progressive tax
3. Kordhinta saamiga cashuuraha berrigu ka yihiin Miisaaniyadda guud
4. Horumarinta dakhli uruurinta iyo sal-balaadhinta cashuuraha
5. Dhaqangalinta xareynta billaha ah ee Cashuurta iibka iyo agabka



6. Xoojinta iyo taageeridda istaraatiijiyadda ballaadhinta kastamada gaar ahaan gobollada bari
7. Isticmaalka nidaamka diiwaangelinta madaxa tirinta si kor loogu qaado Cashuuraha Macaashul-macashka ganacsiga, cashuurta Shaqaalaha iyo kirooyinka.
8. Ka faa'iidsiga golayaasha degaanka cusub ee la doortay si loo xoojiyo cashuuraha IRD ee ay qaadaan Dowladdaha hoose;
9. Dhaqangelinta ganaaxyada iyo canshuuraha (tigidhada) iyo hubinta in xafiis kasta oo IRD ah uu gaaro yoolalka dakhli ururinta;
10. Dhaqangelinta cashuuraha badeecadaha iyo adeegga wax-soo-saarka warshadaha
11. Ku rakibida agabka GST (Cashuurta Badeecooyinka iyo Adeegga) ee xarumaha ganacsiga dhexe iyo kuwa waaweyn, isgaadhsiinta iyo korontada.
12. Dhaqangelinta qodobada Xeerka Dakhliga ee wax laga bedelay iyo in si buuxda loo dhaqan galiyo sharciyada cashuuraha.

8. GUUD MARKA ODORASKA DAKHLIGA 2025

Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu yoolka la hiigsanayo sannadka 2025 waxa lagu saleeyay dakhliga dhabta ee soo xarooday mudada sagaalka bilood ee sanadka 2024 . Odoroska dakhliga ee sannadka 2025-ka waxa uu noqon doonaa **2,575 Trillion (laba tiriliyan shan boqol iyo shan todobaatan bilyan oo shilinka SL\$)**. Korodh iyo hoos- u dhac waa ka suurto gal wadciga Somaliland haatan ka jira. Hakad ku yimi isku socodka ganacsiga caalamiga ah, dagaalka Ruushka iyo Yukrayn, gubashadii suuqayada waaheen, Wajaale iyo colaadaha ka taagan gobolka Sool ayaa la filayaa inay saamayn taban kusii yeeshaan odoroska dakhliga ee sanadka 2025.

Odoroska dakhliga ee sanadka 2025 ayaa lagu saleeyay siyaasada hanaanka cashuuraha, wax-soo-saarka dhaqaalaha guud ee dalka, heerka sicir bararka iyo sarifka lacagaha qalaad, dhoofka xoolaha nool iyo dhaqdhaqaaqa ganacsiga caalamiga ah.

Wasaaradda horumarinta maaliyaddu waxay is bedel ku samaysay hanaanka iyo siyaasadda cashuuraha, taasoo kor u qaadi doonta qoondada dakhliga guud ka yahay wax-soosaarka dhaqaalaha guud ee dalka (Revenue GDP ratio), isla markaana hiigsiga yahay in la gaadhsiiyo 14% mustaqbalka dhaw. sidoo kale kor u qaadida saamiga cashuuraha berigu ka yihiin dakhliga guud ayaa ah mudnaanta kowaad, si loo yareeyo ku tiirsanaanta cashuuraha Kastamada oo hada ah 76% ka ah dakhliga guud ee dalka .

Kobaca dakhliga ee sannadadii u dambeeyay ayaa muujinaya dedaalka iyo dib u habaynta lagu sameeyay hanaanka dakhli ururinta dalka. Sidoo kale Wasaaradda maaliyaddu waxay awooda saartay hanaanka cashuur-bixinta, wacyigelinta iyo diiwaangelinta cashuur bixiyayaasha. Odoroska Dakhliga ee sanadka 2025 wuxuu salaysanyahay aragtiyo taxader iyo rajo leh (togan) islamarkana ka turjumaya xaaladaha dhaqaale ee dalka.

Odoroska Dakhliga ee sanadka 2025 waxa uu ka iman doona qaybahan soo socda:

- Cashuuraha Macaashal Macaashka iyo Faa'idada
- Cashuurta Ganacsiga Caalamiga ah
- Cashuuraha Alaabta iyo Adeega
- Deeqaha dawladdaha iyo hayadaha Caalamiga
- Dakhliga libka iyo Adeega Dawladda
- Dakhliga hantida sida iibka iyo kirooyinka hantida Dawladda



Shaxda 11: Soo koobida Qeybaha waaweyn ee Dakhliga 2025

Faah-faahin	Odoroska Dakhliga 2024	Odoroska Dakhliga 2025	Saamiga Guud
Ganacsiga Caalamiga ah	1,192,685,958,748	1,193,985,958,748	47%
Cashuuraha libka Badeecadaha & Adeega	510,857,724,375	510,857,724,375	20%
Dakhliyada kale	607,826,143,531	650,826,143,531	25%
Cashuuraha Shaqalaha Dawladda iyo kuwa rayidka	150,190,802,992	150,190,802,992	6%
Macaashal Macaashka Ganacsiga iyo Faa'idada	70,070,622,242	70,070,622,242	3%
Wadarta Guud	2,531,631,251,888	2,575,931,251,888	100%

Meelaha uu ka imanaayo odoroska dakhliga 2025 ayaa kala ah (47%) Ganacsiga caalamiga, (20%) Cashuurta libka Badeecadaha iyo Adeega, (12%) Cashuuraha kale (12%) Dakhliyada Kale (6%) Cashuurta Shaqaalaha Dawladda iyo kuwa rayidka (3%) Macaashal Macaashka Ganacsiga iyo Faa'idada. Dhanka kale cashuuraha dadban ee Badeecada iibka iyo Adeega (GST) oo la dardar galiyay sanadka 2023-ka ayaa si rasmiya loo dhamaystiri doonaa sanadka 2024 goobaha ganacsi ee dhiman, taasoo la filayo in ay kor u qaado dakhliga cashuuraha dadban ee berriga dalka.

8.1 Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2025


Sida ka muuqata Shaxdan hoose, Dakhliga guud ee dawladdu waxa uu ka iman doona 98% Kastamada iyo Cashuuraha Beriga, halka 2% uu ka iman doono Wasaradaha iyo Hayadaha kale ee dawladda. Saamiga ugu badan waxa uu ka iman doona Kastamada 76% halka cashuuraha Berigu ay noqon doonan 22%.

Shaxda 12: Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2025

Ha'ayadda/Wasaaradda	Madax xigaha	Faahfaahinta M/Xigaha	Odoroska Dakhliga
Wasaaradda H.Maaliyadda	Kala duwan	Dakhliga Cashuuraha Beriga	577,537,354,199
Wasaaradda H.Maaliyadda	Kala duwan	Dakhliga Kastamadda	1,959,098,479,203
Wasaaradda Warfaafinta	1420117	Daakhliga Faafinta & lidhehda	59,035,505
	1410611	Dakhliga Kirada Warbaahinta Debedda	672,000,000
Wasaaradda Isgadhsiinta & Tknolojiyada	1420118	Dakhliga Boosaha & Isgaadhsiinta	7,301,150,000
	1420148	Dakhliga Liisamada Boosaha iyo Isgaadhsiinta	688,000,000
Wasaaradda Hawlaha Guud	1410502	Dakhliga Kirada Guryaha & Bakhaarada	444,416,907



	1410608	Dakhliga Ruqsadda Shirkadaha Dhismayaasha	699,109,437
	1410602	Dakhliga libinta Guryaha Dawladda	95,302,411
Wasaaradda .Rer Miyiga	1410601	Dakhliga Khayraadka Dabiiciga ah	252,511,560
Wasaaradda Beeraha	1410610	Dakhliga Ruqsadaha Beeraha	56,557,008
Wasaaradda Macdanta	1410604	Dakhliga Ruqsadda Macdan gurashada	2,063,187,044
Wasaarada Cadaalada & Garsoorka	1420101	Dakhliga Nootaayooyinka	327,637,425
Wasaarada Shaqada & Arimaha Bulshada	1420106	dakhliga Warqadda Ogolaanshaha Shaqada	6,421,896,654
Wasaarada Caafimaadka	1420110	Ruqsadda Ogolaanshaha Mihnadaha Caafimaadka	515,726,900
Wasaarada Qorshaynta	1420206	Dakhliga Ogolaansha Hay'adaha Caalamiga	790,775,863
Wasaardada Ganacsiga	1420147	Dakhliga ogolanshaha dalxiiska	1,020,032,687
	1420107	Dakhliga Liisamada Ganac/& Ruqsooyinka	16,815,632,483
Wasaaradda Kaluumaysiga	1410603	Dakhliga Ruqsadda Kaluumaysiga	244,277,025
Wasaaradda Xanaanada Xoolaha	1420107	Dakhliga Liisamada Ganac/& Ruqsooyinka	315,000,000
Ha'ayadda Dhawrista Tayadda	1420119	Dakhliga Baadhista Cuntada & Daawada	513,169,577
Wadarta Guud ee Odoroska Miisaaniyadda 2025-ka			2,575,931,251,888



Jaantus-ka 10: Soo Koobida Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2025

8.1.1 Odoroska Dakhliga Kastamada oo Deegamaysan 2025


Sida ka muuqata Shaxdan hoose ee muujinaysa Saamiga Kastamada gobalada dalka, kastamka Berbera ayaa ah kan ugu dakhli badan kana soo xaroon doono 63.03% marka la barbardhigo kastamade kale ee dalka, Kastamka Kalabaydh oo ah kastamka labaad ee ugu dakhliga badan ayaa laga filayaa 11.76% halka kastamada madaarka Hargeysa ka yahay ka sedexaad lagana filayo 7.80%. Dhanka kale Kastamada Borama iyo Saylac ayaa saamiga guud ee dakhliga Kastamada ka noqon doonan 5.86% iyo 5.44% sida ay ukala horeeyaan. Halka, isugeynta dhammaan kastamada kale oo dhan ayaa isku noqonaysa 6.38%

Shaxda 13: Odoroska Dakhliga Kastamada ee Miisaaniyadda 2025 oo Deegaamaysan

GOOBTA	ODORASKA 2024	ODORASKA 2025	FARAQA	BOQOLEY	SAMIGA GUUD
BERBERA	1,208,639,991,289.33	1,235,303,695,977.57	26,663,704,688.24	2%	63.05%
KALABAYDH	308,730,289,582.92	230,369,633,377.96	(78,360,656,204.96)	-25%	11.76%
KASTMKA BOORAMA	70,251,882,903.31	114,879,120,741.49	44,627,237,838.18	64%	5.86%
KASTAMKA H/AIRPORT	99,935,172,503.17	152,847,165,629.76	9,911,993,126.59	53%	7.80%
KASTAMKA SAYLAC	114,072,154,971.25	106,628,937,800.18	(7,443,217,171.07)	-7%	5.44%
KASTMKA WAJAALE	25,299,514,528.46	24,675,971,461.82	(623,543,066.64)	-2%	1.26%
KASTAMKA BALIGUBADLE	24,146,081,560.58	20,773,003,867.94	(3,373,077,692.64)	-14%	1.06%
KASTAMKA CEERIGAABO	5,973,521,443.07	18,893,774,225.47	12,920,252,782.40	216%	0.96%
DABAGORAYAAL	-	9,826,280,055.32	9,826,280,055.32	0%	0.50%
KASTAMKA ALLAYBADAY	3,515,238,956.89	8,946,231,722.40	5,430,992,765.51	154%	0.46%
KASTAMKA BURCO	11,690,384,511.95	8,591,619,408.50	(3,098,765,103.45)	-27%	0.44%
KASTAMKA XARIIRAD	23,097,774,325.54	5,889,962,582.07	(17,207,811,743.47)	-74%	0.30%
LAWYO CADDO	-	5,396,488,083.82	5,396,488,083.82	0%	0.28%
KASTAMKA FARAWAYNE	4,100,781,206.06	5,084,726,443.53	983,945,237.47	24%	0.26%
INA GUUXAA	-	3,242,381,842.28	3,242,381,842.28	0%	0.17%
KASTAMKA C/CADO	2,367,521,030.48	3,081,025,819.17	713,504,788.69	30%	0.16%
KASTAMKA DH/HARG	4,262,548,642.14	531,591,864	(3,730,956,778)	87%	0.03%
KASTAMKA CAYNABA	7,446,220,550.85	991,442,924.40	(6,454,777,626.45)	-87%	0.05%
KASTAMKA ABAARSO	884,976,287.78	944,824,747.36	59,848,459.58	7%	0.05%
LAANTA HUBINTA DABAGORYALE	-	285,177,676.09	285,177,676.09	0%	0.01%
KASTAMKA BEER	457,243,922.04	226,886,812.51	(230,357,109.53)	-50%	0.01%
KASTAMKA DILA	99,300,365.67	165,329,762.91	66,029,397.24	66%	0.01%
KASTAMKA LUGHAYA	51,518,924.33	84,185,236.40	32,666,312.07	63%	0.00%
KASTAMKA LASCANOD	1,076,361,696.80	-	-	0%	0.00%
KASTAMKA MASALAH	-	1,350,408,138	1,350,408,138	0%	0.07%
TOTAL	1,916,098,479,202.62	1,959,098,479,203			100.00%



Shaxda 14: Saamiga Goob waliba ka tahay wadarta guud ee Kastamada Miisaaniyadda 2024




8.1.2 Odoros-ka Dakhliga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2025 oo Deegamaysan

Sida ka muuqata jaantuska iyo Shaxda hoose, Odoroska dakhliga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2025-ku waa (577 Billion SLSh), kaas oo ka badnayn wax badan odoraskii sanadkii hore. Marka la eego dhanka Saamiga ay goob waliba ka tahay dakhliga guud ee Cashuuraha Berriga, Hargaysa ayaa ah tan ugu badan isla markaana laga filayaa inay soo saarto **68.47%** Wadarta Guud ee dakhliga Cashuuraha Berriga, halka ay ku soo xigto Berbera oo noqonaysa **20.09%**, Burco oo ah **3.93%**, Boorama oo ah **3.86%** iyo Gabiley oo noqonaysa **1.77%**. Wadarta goobaha kale ee Cashuuraha Berrigu waa **1.88%**.

Shaxda 14: Odoraska Dakhliga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2025 oo Deegaamaysan

GOOBAHA	ODOROSKA 2024	DAKHLIGA KU TALO-GALKA 2025	FARAQA	% ISBEDELKA	% SAAMIGA GUUD
HARGEISA	395,293,681,033	395,422,000,001	128,318,968	0%	68.47%
BERBERA	116,372,588,960	116,000,123,538	-372,465,422	0%	20.09%
BORAMA	22,166,922,235	22,298,922,235	132,000,000	1%	3.86%
BUROA	22,547,968,502	22,699,968,502	152,000,000	1%	3.93%
GEBILAY	10,178,041,437	11,489,745,350	1,311,703,913	13%	1.99%
CEERIGAABO	5,686,378,035	5,734,369,043	47,991,008	1%	0.99%
ZAYLAC	1,465,418,721	1,561,099,750	95,681,029	7%	0.27%
CAYNABO	1,284,722,530	1,553,351,355	268,628,825	21%	0.27%
OODWAYNE	677,665,434	777,774,425	100,108,991	15%	0.13%
TOTAL	575,673,386,887	577,537,354,199	1,863,967,312	4%	100%



Jaantus-ka 11: Saamiga Goog waliba ka tahay wadarta guud ee Cashuurha Berriga Miisaaniyadda 2024

Faah-Faahinta Madax-Xigayaasha Dakhliga Guud ee 2025




9. FAAH-FAAHINTA KHARASHKA MIISAANIYADDA 2025

9.1 Saamiga Wadaagayaasha ee Miisaaniyadda 2025

Sida ka muuqata Shaxda iyo Jaantuska hoose, kharashka ku baxa Hay'addaha Amniga waxa uu Miisaaniyadda Guud ka yahay **38%**, taas oo kuu muujinaysa in Amnigu Miisaaniyadda guud ka yahay saamiga ugu badan marka loo eego wadaagayaasha kale. Dhanka kale, Wadaagayaasha Dhaqaalaha, Maamulka, Waxbarashada, iyo Caafimaadku waxay Miisaaniyadda Guud ka yihiin kala badh **48%**, halka ay Wadaagayaasha Biyaha, Deegaanka, Tamarta, Kaabayaasha Dhaqaalaha, Wax-soo saarka iyo Qaybaha kale ka yihiin **14%**.

Shaxda 15: Soo Koobida Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miisaaniyadda 2025

M/Xige	Miis. (2024)	Miis. (2025)	Faraqa	S/Guud
1010000 Amaanka iyo Difaaca	929,202,748,316	976,556,630,511	47,353,882,195	38%
1020000 Biyaha Nadaafada iyo Fayodhowrka	33,511,701,197	31,599,553,132	-1,912,148,065	1%
1030000 Caafimaadka	135,282,556,965	134,538,654,144	-743,902,821	5%
1040000 Deegaanka	32,954,036,314	31,688,835,684	-1,265,200,630	1%
1050000 Dhaqaalaha	467,439,820,634	425,636,351,751	-41,803,468,883	17%
1060000 Kaabayaasha dhaqaale	93,499,684,442	127,983,161,217	34,483,476,775	5%
1070000 Maamulka	573,248,515,625	487,395,177,213	-85,853,338,412	19%
1080000 Tamarta	12,957,192,220	12,992,205,210	35,012,990	1%
1090000 Waxbarashada	178,752,713,750	178,264,491,270	-488,222,480	7%
1110000 Waxsoosaarka Dalka	56,692,723,017	59,595,455,063	2,902,732,046	2%
1120000 Arimaha Bulshada	108,667,163,481	109,680,736,692	1,013,573,211	4%
Wadarta guud	2,622,208,855,961	2,575,931,251,888	-46,277,604,074	100%



Jaantus-ka 12: Isbarbardhiga Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miis 2024 iyo 2025



9.1.1 Ammaanka

Guud ahaan wadaagahani wuxuu Miisaaniyadda guud ka yahay **38%**, taas oo u dhiganta **976,556,630,510 SLSH**, wuxuu muujinyaa korodh dhan **5%** marka loo eego Miisaaniyadda wadaagaha ee sanadka 2024, waana wadaagaha ugu Miisaaniyadda badan taas oo ay keenatay muhiimadda uu amniga iyo difaacu u leeyihiin waddanka.

Shaxda 16: Wadaagaha Amaanka iyo Difaaca

KHARASH-HAYE	WADAAGAHA AMAANKA	MIISAANIYADDA 2024	MIISAANIYADDA 2025	FARAQA	SAAMIGA
1010100	DIFAACA	34,417,427,535	35,572,415,105	1,154,987,570	4%
1010200	NABADGELYADA	35,012,657,801	37,236,476,612	2,223,818,811	4%
1010400	CIIDANKA ASLUUBTA	82,416,504,774	86,362,285,829	3,945,781,055	9%
1010500	CIIDANKA BOOLISKA	200,073,580,306	212,299,177,715	12,225,597,409	22%
1010600	CIIDANKA ILAALADA XEEBAHA	28,460,965,195	29,480,134,762	1,019,169,567	3%
1010700	CIIDANKA SOCDAALKA	20,001,204,975	20,843,002,220	841,797,245	2%
1010800	CIIDANKA DABDAMISKA	18,599,732,406	17,114,700,669	-1,485,031,737	2%
1010900	WASAARADDA GAASHAANDHIGGA	47,522,547,998	47,268,350,274	-254,197,724	5%
1011000	DIFAACA	462,698,127,325	490,380,087,324	27,681,959,999	50%
	TOTAL	929,202,748,316	976,556,630,510	47,353,882,194	100%

9.1.2 Maamulka

Guud ahaan wadaagahani wuxuu miisaaniyadda guud ka yahay **19%** kaas oo u dhiganta **487,395,177,213 SLSH**. Wadaagaahni wuxuu Sannadka 2025 muhiimad gaar ah siiyey;

- Sharci dajinta
- Kor u qaadida adeega iyo Tayada garsoorka
- Aqoonsi raadinta
- Maamul daadajinta
- Barashada dastuurka iyo xoojinta shuruucada

Shaxda 17: Wadaagaha Maamulka

Kharash-haye)	WADAAGAHA MAAMULKA	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Saamiga
1070100	Wasaaradda Madaxtooyada	131,703,457,815	121,292,345,224	-10,411,112,591	24.9%
1070300	Golaha Guurtida	46,817,251,681	48,907,339,782	2,090,088,101	10.0%
1070400	Golaha Wakiilada JSL	52,876,045,634	60,579,798,914	7,703,753,280	12.4%
1070500	Maxkamadda Sare	9,045,676,623	9,343,180,769	297,504,146	1.9%
1070600	Maxkamadaha Hoose	49,133,483,412	50,774,973,676	1,641,490,264	10.4%
1070700	Xeerilaalinta Guud Ee Qaranka	13,126,601,904	14,343,888,476	1,217,286,572	2.9%
1070800	Hay'adda Shaqaalaha Dawladda	14,515,246,976	13,479,854,314	(1,035,392,662)	2.8%
1070900	Machadka Shaqaalaha Dawladda	8,193,220,653	7,374,956,525	(818,264,128)	1.5%
1071000	Hantidhawraha Guud Ee Qaranka	14,369,671,280	14,413,110,173	43,438,893	3.0%



1071200	Garyaqaanka Guud Ee Qaranka	5,999,819,828	6,303,763,700	303,943,872	1.3%
1071300	Wasaaradda Arrimaha Debedda & Xidhiidhka Caalamiga ah	41,157,086,308	41,588,665,898	431,579,590	8.5%
1071400	Wasaaradda Cadaaladda	13,333,478,154	13,333,446,735	(31,419)	
1071500	Komishanka Xuquuqal Insaanka Qaranka	5,693,416,203	5,865,674,657	172,258,454	2.7%
1071600	Wasaaradda arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka	46,451,209,917	45,311,110,096	(1,140,099,821)	1.2%
1071700	Wasaaradda Dastuurka & Xidhiidhka Golayaasha	10,279,390,784	10,117,804,890	(161,585,894)	9.3%
1071800	Gudiga Dib U Habaynta Shuruucda	2,116,450,832	2,069,165,924	(47,284,908)	
1071900	Gudiga Doorashooyinka Qaranka	75,468,028,594	5,425,745,490	(70,042,283,104)	2.1%
1072000	Gudiga Maamul-wanaaga & Ladagallanka Musuq-maasuqa	6,449,041,907	7,187,413,997	738,372,090	0.4%
1072100	Gudiga Diwaangelinta Ururada	3,736,968,773	3,736,968,773	-	1.1%
1072200	Wasaaradda Dawladaha Hoose & H.Magaalooyinka		5,945,969,200	5,945,969,200	1.5%
	Total	550,465,547,278	487,395,177,213	(63,070,370,065)	100%

9.1.3 Caafimaadka

Guud ahaan wadaagahani wuxuu ka yahay Miisaaniyadda **5%** oo udhiganta **134,538,654,144 SL.SH**, waxaana Sannadkan 2025 muhiimada siinyaa.

- Horumarinta iyo daryeelka cisbitaalada dhimirka;
- Iibsiga qalabka Caafimaadka
- Kor u qaadida adeega mishiinada kelyaha

Shaxda 18: Wadaagaha Caafimaadka

Kharash-haye	WADAAGAHA CAAFIMAADKA	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Saamiga
1030100	Komishanka Aids-ka Qaranka	8,118,353,911	7,607,395,294	(510,958,617)	6%
1030200	Wasaaradda Horumarinta Cafimaadka	112,558,539,872	111,485,554,664	(1,072,985,208)	83%
1030300	Komishanka Mihnedlayaasha Cafimaadka	2,980,745,847	3,057,636,507	76,890,660	2%
1030400	Hay'adda Ilaalinta Tayada	11,624,917,335	12,388,067,679	763,150,344	9%
	Total	135,282,556,965	134,538,654,144	(743,902,821)	100%



9.1.4 Waxbarshada

Wadaagahani wuxuu Miisaaniyadda Guud ka yahay **7% una dhiganta 178,264,491,270 SL.SH.**

Shaxda 19: Wadaagaha Waxbarashada

WADAAGAHA WAXBARASHADA	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Saamiga
Wasaaradda Waxbarashada & Sayniska	169,461,467,625	168,370,751,085	-1,090,716,540	94%
Gudiga Tacliinta Sare	9,291,246,125	9,893,740,185	602,494,060	6%
Total	178,752,713,750	178,264,491,270	(488,222,480)	100%

9.1.5 Tamarta

Wadaagahani wuxuu ka yahay Miisaaniyadda **1% oo u dhiganta 12,992,205,210 SI/Sh.**

Shaxda 20: Wadaagaha Tamarta

Kharash-haye	WADAAGAHA TAMARTA	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Saamiga
1080100	Wasaaradda Macdanta & Tamarta	10,398,484,030	10,316,421,852	(82,062,178)	79%
1080200	Komishanka Tamarta	2,558,708,190	2,675,783,358	117,075,168	21%
	Total	12,957,192,220	12,992,205,210	35,012,990	100%

9.1.6 Waxsoo-saarka

Waxsoo-saarku wuxuu Miisaaniyadda 2025 yahay **2% una dhiganta, 59,595,455,063 SI/Sh**, waxaanu tilmaamayaa meelaha muhiimada la siiyey sanadka 2025 ka waxaa ka mid ah;

- Kor u qaadista Cilmi baadhista iyo fidinta Beeraha
- Xoojinta wax soosaarka dalka
- Daawaynta iyo shaybaadhka Xoolaha;
- Fulinta siyaasadda cashuur dhaafka qalabka la xidhiidha wax-soosaarka Beeraha, kaluumeysiga iyo War-hadeyntaba.

Shaxda 21: Wadaagaha Wax-soosaarka

Kharash-haye	WADAAGAHA WAXSOOSAARKA	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Saamiga
1110100	Wasaaradda Horumarinta Beeraha	19,550,156,940	19,258,739,874	(291,417,066)	32%
1110200	Hay'adda Cilmibaadhista Beeraha	2,453,561,468	2,432,311,468	(21,250,000)	4%
1110300	Wasaaradda Xannaanada Xoolaha & Reer miyiga	29,356,209,795	29,506,110,651	149,900,856	50%



1110400	Wasaaradda Kalluunka & Horumarinta Xeebaha	5,332,794,814	8,398,293,070	3,065,498,256	14%
	Total	56,692,723,017	59,595,455,063	2,902,732,046	100%

9.1.7 Deegaanka

Wadaagahani Miisaaniyadda Guud wuxuu ka yahay **1%** oo u dhigant **31,688,835,684 SL.SH**, Wadaagahani wuxuu muhiimada siinayaa;

- Ilaalinta Deegaanka iyo ka hortaga xaalufka;
- Seera xiliyeedyada
- Daryeelka duurjoogta iyo ugaadha;
- Ka jawaabida xaaladaha degdega ah ee ay keenaan Masiibooyinka debiiciga ah

Shaxda 22: Wadaagaha Deegaanka

Kharash-haye	WADAAGAHA DEEGAANKA	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Saamiga
1040100	Hay'adda U Diyaargarawga Afooyinka & Kaydka Raashinka	11,144,199,786	8,143,350,196	(3,000,849,590)	26%
1040200	Wasaaradda Deegaanka & Isbadalka Cimilada	21,809,836,528	23,545,485,488	1,735,648,960	74%
	Total	32,954,036,314	31,688,835,684	(1,265,200,630)	100%

9.1.8 Biyaha

Wasaaradda biyaha oo ah Wasaaradda kaliye ee ku jirta wadaagahan waxay Miisaaniyadda guud ka tahay **31,599,553,132 slsh** una dhiganta **1%**. SI/Sh, Wadaagahani wuxuu Sannadkan xooga saarayaa;

- Dhamaystirka biyo balaadhinta Gobolada
- Dhamays tirka dhaamamka ee gobolada laga hirgeliyo;
- Dhamaystiraka qodida ceelasha

Shaxda 23: Wadaagaha Biyaha

Kharash-haye	WADAAGAHA BIYAHA	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Saamiga
1020100	Wasaaradda Biyaha	33,511,701,197	31,599,553,132	(1,912,148,065)	100%
	Total	33,511,701,197	31,599,553,132	(1,912,148,065)	

9.1.9 Dhaqaalaha

Wadaagahani wuxuu ka yahay Miisaaniyadda guud **17%** oo u dhiganta, **425,636,351,751 SI/Sh**, wadaagahani wuxuu muhiimada siinayaa;

- Kaydka Qaranka
- Sanduuqa mashaariicada horumarineed
- Kor u qaadista dakhli ururinta;
- Dhiirigalinta maalgashiga gudaha



Shaxda 24: Wadaagaha Dhaqaalaha

Kharash-haye	WADAAGAHA DHAQAALAHA	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Saamiga
1050100	Wasaaradda Qorshaynta & H.Qarankna	13,483,278,758	13,451,541,950	-31,736,808	3%
1050200	Wasaaradda Maaliyadda iyo H.Dhaqaalaha	411,573,648,113	370,248,193,913	-41,325,454,200	87%
1050300	Hay'adda Caymiska Qaranka	3,619,488,761	3,483,836,843	-135,651,918	1%
1050400	Wasaaradda Ganacsiga & Dalxiiska	19,965,767,825	20,192,671,937	226,904,112	5%
1050500	Hay'adda Aagga Cashuuraha Ka Caagan	2,537,471,873	2,473,495,231	-63,976,642	1%
1050600	Gudiga Qandaraasyada Qaranka	5,362,374,942	5,422,934,708	60,559,766	1%
1050700	Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga	10,897,790,362	10,363,677,170	-534,113,192	2%
	Total	467,439,820,633	425,636,351,752	-41,803,468,881	100%

9.1.10 Kaabayaasha Dhaqaalaha

Wadaagahani wuxuu Miisaaniyadda guud ka yahay **5%**, una dhiganta **127,983,161,218 SL/Sh**.waxyaalaha uu muhiimada siinayo wadaagahani waxaa ka mida ah;

- Horumarinta wadooyinka
- Horumarinta madaarada;

Shaxda 25: Wadaagaha Kaabayaasha Dhaqaalaha

kharash-haye	WADAAGAHA KABAYAASHA DHAQAALAH	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Saamiga
1060100	Wasarada Gaadiidka	49,612,416,748	45,459,398,838	-4,153,017,910	33%
1060200	Wasarada Isgaadhsiinta	12,068,187,111	11,402,901,597	-665,285,514	8%
1060300	Wasarada Hawlaha Guud	17,171,471,829	17,219,274,345	47,802,516	12%
1060400	Wasaaradda Duulista Hawada & H.Madaarada		53,901,586,438	43,784,746,070	46%
	Total	78,852,075,688	127,983,161,218	49,131,085,529	100%



9.1.11 Wadaagaha kale (cross-cutting Sector)

Wadaagahan waxaa ku midaysan afar Wasaaradood iyo laba Hay'adood oo dhamaantood ay isugu yimaadaan adeegyada Bulshadu, waxay Miisaaniyadda guud ka yihiin **4%** oo u dhiganta **109,680,736,693 SL/Sh**, Wadaagahani wuxuu muhiimada saarayaa;

- Dhiirigalinta maalgalinta dhalinyarada;
- Horumarinta ciyaaraha;
- Daryeelka Dadka nugul;
- La dagaalanka iyo ka hortga mukhaadaraadka;
- Kor u qaadida kaalmooyinka bulshada ee kala duwan.

Shaxda 26; Wadaagayaasha Kale (Cross-Cutting Sector)

WADAAGAYAASHA KALE	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Saamiga
Wasaaraada Warfaafinta, Dhaqanka & wacyigalinta Dhaqanka & Wacyigalinta	43,383,859,342	41,384,097,140	-1,999,762,202	38%
Wasaaradda Diinta & Awqafta	17,397,165,857	17,774,767,887	377,602,030	16%
Wasaaradda Shaqogelinta, Arrimaha Bulshada & Qoyska	20,074,161,181	20,461,812,639	387,651,458	19%
Wasaaradda Ciyaaraha & Dhalinyarada	16,527,715,431	18,196,356,049	1,668,640,618	17%
Hay'adda Qaxootiga & Barakacayaasha	8,968,419,937	9,547,861,245	579,441,308	9%
Ururka Mujaahidiinta	2,315,841,733	2,315,841,733	0	2%
Total	108,667,163,481	109,680,736,693	1,013,573,212	100%

9.2 Soo Koobida Qeybaha Miisaaniyadda 2025

Sida ka Muuqata Shaxdan iyo Jaantuskan hoose, kharashka ku baxa Shaqaalaha oo ka kooban mushaharooyin iyo gunooyin waxa ay miisaaniyadda guud ka yihiin in ka badan kala badh **62.4%** taas oo ina tusaysa in kala badh in ka badan miisaaniyadda dawladdu ku baxayso Mushaharooyinka.


Dhanka kale, kharashyada Alaabta & Adeeggu waxa uu miisaaniyadda guud ka yahay **19%**, Dhismayaasha iyo mashaariicada dawladdu waxay Miisaaniyadda 2025 ka yihiin **8.2%**, halka Deymaha, kharashka kaydka qaranka, kharashyada kale, Deeqaha, daryeelka bulshada, kabka iyo Kaalmooyinka qeybaha kale ee Dowladda ka yihiin Miisaaniyadda **10.9%**.

Shaxda 27: Soo Koobida Qeybaha Waaweyn ee Kharashka Miisaaniyadda 2025

QAYBAHA WAAWAYN EE MIISAANIYADDA	MIISAANIYADDA 2024	MIISAANIYADDA 2025	Faraqa	Saamiga
Magdhawga shaqaalaha	1,473,516,257,144	1,606,194,496,019	111,443,947,611	62.4%
Khaharashka alaabta & adeega	472,072,697,716	494,666,794,813	22,594,097,097	19%
Daryeelka	24,094,490,095	26,242,588,332	2,148,098,237	1%
Mashaariicda dawladda	178,063,774,759	159,743,115,658	-18,320,659,101	6.2%
Kabka	35,940,246,453	5,439,005,415	-30,501,241,038	0%
Kaalmooyinka	45,006,047,036	50,369,547,036	5,363,500,000	2%



Dayeryeelka bulshada	8,758,960,000	9,314,960,000	556,000,000	0.4%
Kharashyada kale	78,939,328,141	86,679,828,141	7,740,500,000	3%
Hantida raagta	66,162,524,883	36,780,916,474	-29,381,608,409	2%
Biilasha Taagan	41,940,000,000	60,500,000,000	18,560,000,000	2.3%
Kaydka Qaranka	149,441,807,000	40,000,000,000	-109,441,807,000	1.6%
Total	2,584,778,278,859	2,575,931,251,888	-8,847,026,971	100%



Jaantus-ka 13: Soo Koobida Saamiga Qeybaha Miisaaniyadda 2025

9.2.1 Kharashka Shaqaalaha

Kharashka ku baxaya shaqaalaha sannad miisaaniyadeedka 2025 waa **1,606,194,496,019 SI.Sh.** Taas oo **62.4%** ka ah miisaaniyadda guud ka ah in ka badan kala badh.

Taana waxa keenay sababahan hoos ku xusan:

- Tirada shaqaalaha iyo ciidamada oo kordhaya sanadba sanadka ka danbeeya
- Dalacaadaha shaqaalaha iyo Ciidamada
- Korodhka mushaharka ciidamada.

9.2.2 Karashka Alaabta & Adeegga Ama Hawl socodsiinta

Kharashka loo qoondeeyey alaabta & adeegga ama hawl socodsiinta hay'addaha dawladda sanad-miisaaniyadeedka 2025 wuxuu dhanyahay, **494,666,794,813 SI. Sh.**

9.2.3 Hantida Raagta

Miisaaniyadda loo qoondeeyey Hantida raagta waa **36,780,916,474 SL. Sh.** waxay Miisaaniyadda Guud ka tahay **2%** Hantida raagta waxaa loola jeedaa dhismeyaasha, Gaadiidka, Mishiinada, Doonayaha iyo hantida raagta ee kale.

Mashaariicda Kale ee Dawladda ee aan ahayn hantida raagta sanadkan 2025 waa **159,743,115,658 SL/Sh.** taas oo Miisaaniyadda guud ka noqonaysa **6.2%**,

Guud ahaan Mashaariicda cusub iyo kuwii hore u jiray oo la xoojiyey waxaynu ka xusi karnaa karnaa;

- Mashaariicda Caafimaafka iyo waxbarashada



- Mashaariicda Beeraha
- Mashaariicda Xoolaha & Kalluumaysiga
- Mashaariicda Deegaanka iyo daryeelka ugaadha
- Mashaariicda Sahaminta Macdanta iyo Shidaalka
- Mashaariicda Horumarinta dhalinyarada iyo qabashada koobka liigaga
- Mashaariicda Horumarinta Wadooyinka iyo Madaarada
- Mashaariicda Maamul daadejinta
- Mashruuca horumarinta cisbitaalada dhimirka
- Sanduuqa h.mashaariicda

9.2.4 Kaalmooyinka & Daryeelka Bulshada ee Dawladdu Bixiso

Miisaaniyadda loo qoondeeyey Kaalmooyinka iyo Daryeelka Dawladdu siiso ama ku bixindoonto qayabaha kala duwan ee bulshada sanadka 2025 waxay dhan tahay **59,684,507,036 SL/SH**, Waxay Miisaaniyadda guud ka noqonayaan **2.4%**.

- Kaalmooyinka axsaabta;
- Kaalmooyinka ururada bulshada;
- Kaalmada dugsigayada agoomaha & baahiyaha gaarka
- Kaalmada ururada suxufiyiyinta sida SOLJA, WIJA, FIMS iyo Dawan;
- Kaalmooyinka Cusbitaalada, Iskuulada, Jaamacadaha & Machadada;
- Daryeelka dadka jilicsan, barokacayaasha, Naafada, Dhimirka & Qaxootiga.

9.2.5 Daynta Qaranka

Daynta kharashka loogu talagalay waxaa weeyi **60,500,000,000 SL.sh**, waxayna Miisaaniyadda guud ka tahay **2.3%**, Waxa lagu bixiyaa kharashkan daymo soo taxnaa ilaa xilliyadii dawladihii kala duduwanaa ee Somaliland soo maray iyo daymaha ka yimaada waxyaalaha sida lama-filaanka ah u dhaca ee aan Miisaaniyad ku filan loo hayn waxka-qabashadooduna ay lagama maarmaan tahay (Extra ordinary items).

9.3 Mashaariicda uu maalgalinayo Bangiga Adduunku Miis. Sanadka 2025

Mashaariicda ay Maalgaliyaan Qaadhaanbixiyeyaashu waxay ka koobanyihiin Mashruuca SESRP oo ay fulinayso Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta, Mashaariicda Sanduuqa Horumarinta Somaliland(SDF), Mashruuca SERP oo ay Fulinayso Wasaaradda H. Maaliyadda, Mashruuca Barwaaqo oo ay fulinayso Wasaaradda Qorshaynta Qaranka, Mashruuca Abaartire oo ay fulinaysa Wasaaradda H. Biyaha, Mashruuca ERADIP oo ay fulaynayso Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tignoolajiyadu, Mashruuca FSRP oo ay fulinayso Wasaaradda Beeruhu iyo labada mashruuc ee rajo kaaba iyo E4HCD oo ay fulinayso Wasaaradda waxbarashada iyo barbaarinta caruurtu.

9.3.1 Mashruuca SERP

Mashruucan waxaa awooda la saarayaa sidii loo xoojin lahaa awoodda hay'adaha Dowladda, isla xisaabtanka, iyo hufnaanta maamulka kheyraadka guud ee hay'adaha qaybta ka ah Mashruuca.

Meelaha uu mashruucu wax ka qabanayo waxaa ka mid ah:



- Maamuka Maaliyadda Dawliga ah,
- Kor u qaadida dakhliga gudaha,
- Maamulka guud ee dawliga ah,
- Wada shaqaynta hayadaha dawladda.

Mashruucan waxaa ka faa'iidaydhanaya:

- ✓ Wasaaradda Maaliyadda
- ✓ Hantidhawrka Guud ee qaranka
- ✓ Komishanka Maamul wanaaga
- ✓ Gudiga Qandaraasyada Qaranka
- ✓ Golaha wakiiladda (Gudiga Dhaqaalaha ee Gollaha Wakiilada)
- ✓ Hayada Shaqaalaha Dowladda.

Lacagta Mashruucan ku baxaysaa waxay dhantahay shan milyan afar boqol todoba iyo afartan kun iyo sided boqol oo dollar **\$5,887,000** una dhiganta **41,209,000,000 shillin**.

9.3.2 Mashruuca Abaar-tire (GW4R)

Mashruuca Abaar tire waxaa maalgalineya Baanka Aduunka waxaaana fulineysa Wasaaradda Horumarinta Biyaha, lacagta Mashruuca ku baxaysaa waxay dhantahay \$ **1,709,294** una dhiganta **11,965,058,000 Shl**, Mashruucu waxayaalaha uu qaban doona waxaa ka mida:

- Gaadhsiinta adeega biyaha ee dhulka hoostiisa meelaha biyo la'aantu kajirto
- Abuurida nidaam isku mid ah oo lagu horumarinaayo laguna maamulaayo biyaha dhulka hoostiisa
- Kor u qaadida xirfadaha shaqaalaha ee la xidhiidha biyaha

9.3.3 Mashruuca SESRP

Mashruucan oo uu isna maalgalinayo Baanka Aduunku waxaa uu awooda saarayaa dhinaca tamarta gaar ahaan tamarta aan waxyeeleyn deegaanka sida tamarta cadceeda, lacagta Ku baxaysaa waxay dhantahay laba iyo soddon milyan lix boqo sagaal iyo lixdan, lix boqol afar iyo konton, toddoba iyo sideetan senti (**\$32,669,654.87**) una dhiganta **228,687,584,090 oo SLShillin ah**. Mashruucani meelaha uu wax ka qabanayo waxaa ka mid ah:

- Samaynta Xarun weyn oo laga sameeyo Hargeysa taas oo ah Gudbinta hoose iyo qaybinta laydhka si haboon oo filaansho leh
- Isku-dhafka iyo nidaamyada kaydinta baytariga ee Dab qaybiyaha ama Dab dhaliye (minigrids)
- Helitaanka xarumaha cadceedda ee kaligood ah ee xarumaha dawladda gaar ahaan waxaa ka mida wasaarada caafimaadka iyo Wasaarada waxbarashada.
- Horumarinta Aqoonta Shaqaalaha Hay'ada Tayaynta iyo Wasaarada Tamarta.



9.3.4 Mashruuca FSRP

Mashruucan oo uu Maalgalinayo Baanka Aduunku waxaa awooda uu saarayaa dhinaca waxsoosaarka beeraha, xoolaha iyo badqabka deegaanka waxaana ku baxaysa lacag dhan shan milyan laba boqol oo kun iyo boqol iyo laba iyo sagaashan dollar (**\$5,200,192.00**) una dhiganta **36,401,344,000 oo SLShillin**.

Mashruucani meelaha uu wax ka qabanayo waxaa kamida

- Kor u qaadidda wax-soo-saarka beeraha
- Taageeridda horumarinta joogtada ah ee khayraadka dabiiciga ah
- Suuqgaynta wax-soo-saarka
- Kobcinta iyo dejinta siyaasadaha qaranka ee nidaam cunto oo waara

9.3.5 Mashruuca EARDIP

Mashruucan oo uu maalgalinayo Baanka Aduunku waxaa aku baxaysa lacag dhan saddex milyan sagaal boqol iyo todoba Kun afar iyo iyo labaatan dollar (**\$ 4,591,195**) una dhiganta **32,138,365,000 oo SLShillin**.

Mashruucan oo ay fulinayso Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tignoolajiyaddu meelaha uu wax ka qabanayo waxaa kamida:

- Horumarinta iyo is_dhex galka suuqyada is_gaadhsiinta
- Horumarinta iyo is_dhex galka suuqyada xogaha
- Horumarinta iyo is_dhex galka suuqyada online ka ah
- Taageerada fulinta iyo maareynta mashruuca

9.3.6 Mashruuca Damal Caafimaad

Mashruucan oo uu maalgalinayo Baanka Aduunku waxaa ku baxaysa lacag dhan saddex milyan sagaal boqol iyo lixdan kun todoba boqal iyo afartan dollar (**\$ 3,998,620.61**)

una dhiganta **27,990,344,270 oo SLShillin**.

Mashruucan oo ay fulinayso Wasaaradda Horumarinta Caafimaadkumeelaha uu wax ka qabanayo waxaa kamida

- ✓ Balaadhinta adeegyada caafimaadka iyo nafaqaynta
- ✓ Xoojinta korjoogtaynta dawladda si kor loogu qaado adeeg bixinta caafimaadka
- ✓ Kor u qaadida xirfadaha shaqaalaha ee la xidhiidha caafimaadka
- ✓ Taageerada fulinta iyo maareynta mashruuca

9.3.7 Mashruuca ISEGP

Mashruucan oo uu maalgalinayo Baanka Borumarinta Africa waxaa ku baxaysa lacag dhan \$ **1,990,081.84** una dhiganta **13,930,572,880 SLShillin** meelaha uu awaada saaraya waxaa ka mida

- ✓ Kobcinta dakhliga Gudaha
- ✓ Hagaajinta kharashaadka dawladda iyo maaraynta deynta



- ✓ Kor u qaadida daahfurnaanta miisaaniyadda Xoojinta islaxisaabtanka iyo la dagaalanka musuq-maasuqa
- ✓ Taageerada fulinta iyo maareynta mashruuca

9.3.8 Mashruuca Barwaaqo

Mashruuca Barwaaqo oo ay fulineyso Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka ee Jamhuuriyadda Somaliland oo uu maalgalinayo baanka aduunku, waxaa loo qoondeeyay miisaaniyad dhan afar milyan laba boqol iyo kontan kun oo dollar (**\$4,250,000.00**) una dhiganta **29,750,000,000** oo SLShillin..

Meelaha uu mashruucu xooga saaraya wax ka mid ah:

1. Horumarinta Ilo-biyaha:
2. Horumarinta iyo dhisidda awoodda maamulka biyaha.
3. Horumarinta Adeegyada Beeraha iyo Xoolaha
4. Horumarinta Adeegyada Soo Celinta Deegaanka

9.3.9 Labada Mashruuc ee Rajo Kaaba iyo E4HCD

Labadan Mashruuc oo uu maalgainayo Baanka aduunku waxaa ka faa iidsan doona Wasaarada Waxbarashada iyo Barbaarinta Caruurta, waxaana ku baxaysa lacag dhan **\$4,170,600** una dhiganta **29,194,200,000** SLShillin. Meelaha uu awooda saaraya waxaa ka mida:

- ✓ Xirfadaha lagu shaqeysan karo dhammaan ardayda wiilal iyo gabdhaba
- ✓ Horumarinta Xirfadaha Sare ee Hogaaminta Haweenka.
- ✓ Balaadhinta helitaanka waxbarasho tayo leh oo ay helaan dadka danyarta ah.
- ✓ Mashruucan ayaa ujeedadiisu tahay in carruurta ka soo jeeda dadka danyarta ah ay helaan waxbarasho tayo sare leh iyada oo aan wax kharash ka bixinayn qoysaskoodu.

9.3.10 Mashruuca Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF)

Mashruuca Sanduuqa Horumarinta Somaliland waa mashruuc ay inaga caawiyaan wadamo badan oo reer Yurub ah oo isutegay. Mashruuca sanadkan waxaa miisaaniyadda ugu jira 55,471,738,000. Meelaha lacagtan wax lagaga qabanaayo waxaa ka mid ah:

- ✓ Biyo balaadhinta
- ✓ Dib u dhiska wadooyinka

Shaxda 28: Liiska Mashaariicda uu Maalgalinayo Banngiga Adduunku Miisaaniyadda 2025

No	Magaca Mashruuca	Lacagta oo shillin ah
1	Mashruuca SERP (W.H. Maaliyadda)	41,209,000,000
2	Mashruuca Damal Caafimad.	27,990,344,270
3	Mashruuca (FSRP)	36,401,344,000.00
4	Mashruuca Abaartire (W.H. Biyaha)	11,965,058,000
5	Mashruuca Barwaaqo (Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka)	29,750,000,000
6	Mashruuca SESRP (W. Macdanta)	228,687,584,090.00



7	Mashruuca (ISEGP)	13,930,572,880
8	Mashruuca ERADIP (W. Boosaha iyo Isgaadhsiinta)	32,138,365,000
9	Rajo kaaba iyo E4HCD	29,194,200,000
10	Mashruuca Somaliland Development Fund (SDF)	55,471,738,000
11	Mashruuca EARDIP	32,138,365,000
	Grand Total	506,738,206,240

10. MIISAANIYADDAHA DOWLADDAHA HOOSE IYO HAY'ADDAHA MACAASHKA SAMEEYA EE 2025

10.1 Miisaaniyadda Hay'addaha Macaashka Sameeya ee 2025


Sida ka muuqata shaxda hoose, Miisaaniyadda Hay'addaha Macaashka sameeya ee sanadka 2025 waxay dhan tahay **273,633,516,978 S/sh.**

Miisaaniyadda Hay'addaha macaashka sameeya oo isugu jirta Wakaaladaha Biyaha iyo Hay'addaha kale waxay miisaaniyadoodu ka yar tahay marka la barbardhigo tii sannadkii hore **(-1%)**. Waxaa jira hoos u dhac iyo korodh ku ka muuqda miisaaniyadda hay'adahan, waxaana ka mid ah wakaaladda biyahay Hargeysi oo samaysay korodhka ugu badan taas oo korodhay (39%), halka ay ku soo xigaan Madbacada Qaranka iyo Hay'adda Duulista Madaarada oo kordhay 17% iyo 12% oo ah say u kala horeeyaan.

Dhanka kale, waxa jira Hay'addo ay ka muuqato hoos u dhac taas oo laga dareemayo haamaha shidaalku inay inay sameeyeen hoos u dhac aad u badan oo ah **(-41%)**, halka ay ku soo xigaan Baanka dhexe iyo Dekeda berbera oo mid waliba hoos u dhacday **(-6%)** iyo **(-21%)**.

Shaxda 29: Soo koobista Miisaaniyadda Hay'addaha Macaashka Sameeya 2025

Miisaaniyadda Hay'addaha Macaashka Sameeya 2025				
No	Magaca Hay'adda	2024	2025	Faraq
1	Banka dhexe	51,717,731,131	48,542,725,603	(3,175,005,528)
2	Ha'yadda Duulista	21,627,400,000		
3	Haamaha Shidaalka	48,175,450,000	28,550,662,000	(19,624,788,000)
4	Dekada Berbera	41,560,461,000	31,677,698,640	(9,882,762,360)
5	Madbacada Qaranka	22,161,669,400	29,305,496,105	7,143,826,705
6	Wakaalada Biyaha Berbera	11,053,295,000	11,236,830,000	183,535,000
7	Wakaalada Biyaha Hargiesa	49,448,385,536	68,975,359,313	19,526,973,777
8	Wakaalada Biyaha Wajaale	-	2,020,700,000	2,020,700,000
9	Wakaalada Biyaha Gabiley	4,290,063,627	4,950,000,000	659,936,373
10	Wakaalada Biyaha Arabsiyo	-	1,350,000,000	1,350,000,000
11	Wakaalada Biyaha Burco	27,758,439,840	27,082,773,400	(675,666,440)
	Grant Total	277,792,895,534	273,633,516,978	2,473,250,473




Jaantus-ka 14: Miisaaniyadda Hay'adaha Macaashka sameeya ee 2025

10.2 Miisaaniyaddaha Dowladdaha Hoose ee 2025


Miisaaniyadda dowladdaha hoose ee sannadka 2025 waxay dhantahay **564,117,669,25 SLSH**, taas oo ka yar Miisaaniyadii sanadkii 2024 (-4%). Marka si gaara loo eego degmooyinka derejada **A** waxa hoos u dhaceen -3%, halka degmooyinka darajooyinka **B** iyo **C** ay hoos u dhaceen -13% iyo -30%, waxaa korodh sameeyey degmooyinka darajada **D** iyagoo kordhay 39% marka loo eego miisaaniyadii 2024-ka.

Shaxda 30: Miisaaniyadda Dawladaha Hoose ee 2025 oo Darajaysan

Grade	Miisaaniyadda 2024	Miisaaniyadda 2025	Faraqa	Korodhka
Grade A	473,819,440,619	459,558,579,188	(14,260,861,431)	-3%
Grade B	42,272,947,000	36,964,945,673	(5,308,001,327)	-13%
Grade C	50,659,151,962	35,401,519,628	(15,257,632,334)	-30%
Grade D	23,147,657,504	32,192,624,768	9,044,967,264	39%
Total	589,899,197,085	564,117,669,257	(25,781,527,828)	-4%



Jaantus-ka 15: Isbarbar-dhiga Darajooyinka Dawladaha Hoose ee 2024-2025



Jaantus-ka 16: Darajooyinka Dawladaha Hoose ee Miisaaniyadda 2025



DAKHLIGA GUUD

1110100	Cashuurta Dakhliga iyo Faa'idada				
M/Xige	Faahfaahin	Miis. (2024)	Miis. (2025)	Faraqa	Boqoleey
1110101	Cashuurta Macaashka Guryaha	19,590,008,928	23,598,157,700	4,008,148,772	20%
1110102	Cashuurta M/M Ganacsiga	36,153,996,220	46,121,930,381	9,967,934,161	28%
1110103	Withholding tax payable by Individuals	190,850,937	550,534,161	359,683,224	188%
	Sub -Total	55,934,856,085	70,270,622,242	14,335,766,157	26%
1120100	Cashuurta Mushahrka Shaqaalaha				
1120101	Cashuurta M/M ee Shaqalaaha Rayidka	53,551,394,523	56,365,237,525	2,813,843,002	5%
1120102	Cashuurta M/M ee Shaqalaaha Dawlada Dhexe	79,768,308,566	80,452,665,393	684,356,827	1%
1120103	Cashuurta M/M ee Shaqalaaha Dawladaha Hoose	5,383,662,119	7,186,370,743	1,802,708,624	33%
1120104	Cashuurta M/M ee Shaqalaaha Hay'adaha Madaxa Banaan	2,770,571,753	2,671,629,921	-98,941,832	-4%
1120105	Cashuurta Muruq-maalka (Dhoobada)	3,890,950,854	4,314,899,409	423,948,555	11%
	Sub -Total	145,364,887,815	150,990,802,991	5,625,915,176	4%
1140100	Cashuurta Alaabta & Adeega				
1140101	Cashuurta Gadidda	330,415,000,000	337,990,520,720	7,575,520,720	2%
1140102	Cashuurta Xakamaynta Alabada ,gaadiidka,tubakada,sharabka	25,690,461,651	30,932,775,241	5,242,313,590	20%
1140103	Cashuurta Qandaraasyada Dhismaha	972,737,713	1,034,667,260	61,929,547	6%
	Sub -Total	357,078,199,364	369,957,963,221	12,879,763,857	4%
1140800	Cashuurta Isticmaalka Alaabta iyo Adeega				
1140805	Cashuurta Maamulka	124,655,821,000	121,295,795,227	-3,360,025,773	-3%
1140807	Cashuurta Waddooyinka	9,564,342,973	9,060,123,341	-504,219,632	-5%
1140803	Cashuurta Dakadaha (H.Tax)	106,351,000,000	105,984,552,051	-366,447,949	0%
	Sub -Total	240,571,163,973	236,340,470,619	-4,230,693,354	-2%
1150100	Cashuurta Soo Dejinta				
1150101	Cashuurta Soo Dejinta	997,874,000,000	953,144,145,763	-44,729,854,237	-4%
1150104	Cashuurta Gudubka Badeecadda	3,890,885,483	4,979,512,917	1,088,627,434	28%
	Sub -Total	1,001,764,885,483	958,123,658,680	-43,641,226,803	-4%
1150200	Cashuurta Dhoofinta				
1150201	Cashuurta Dhoofinta Alaabta	1,801,265,559	6,732,335,278	4,931,069,719	274%
1150203	Cashuurta Dhoofka Xoolaha	86,774,181,348	121,897,167,655	35,122,986,307	40%
	Sub -Total	88,575,446,907	128,629,502,933	40,054,056,026	45%
1160200	Cashuuraha Kale ee Ganacsiga				
1160201	Cashuurta Moorka	117,061,094,000	116,590,826,787	-470,267,213	0%
1160202	Cashuurta Horumarinta Wadada	17,714,583,444	10,963,956,491	-6,750,626,953	-38%
1160203	Cashuurta Saaran Shidaalka (F/leavy)	32,450,321,875	29,121,773,468	-3,328,548,407	-10%
1160205	Cashuurta Saaran Shidaalka Xuduudaha Beriga	1,728,146,101	1,020,153,758	-707,992,343	-41%
1160206	Cashuurta Saaran Qaadka	19,200,463,554	14,998,283,322	-4,202,180,232	-22%
1160207	Cashuurta Saaran Dhoofinta Xoolaha (L/S/Levy)	13,178,330,150	18,119,683,220	4,941,353,070	37%
1160208	Cashuuraha Kala duwan	1,831,387,788	612,921,262	-1,218,466,526	-67%
1160210	Cashuurta 2% ee Horumarinta Gobolada Bariga	105,871,000,000	103,465,768,246	-2,405,231,754	-2%
1160215	Cashuurta Saaran Liisamada Gaadiidka	1,425,168,817	614,283,356	-810,885,461	-57%
1160204	Cashuurta Saaran Wadooyinka (R/L)	1,402,367,257	1,333,390,242	-68,977,015	-5%
	Sub -Total	311,862,862,986	296,841,040,152	-15,021,822,834	-5%
1330200	Deeqaha Raasamaalka ee Dawladda Dhexe				
1330202	Qoondada laga helo LDF iyo JPLG	21,000,000,000	-21,000,000,000		-100%
	Sub -Total	21,000,000,000	-21,000,000,000		-100%
1410500	Dakhliga Hantida				



1410606	Dakhliga Gegeda Diyaaradaha iyo Ajuuradda	7,050,588,376	50,128,133,758	77,545,382	1%
1410610	Dakhliga Ruqsadaha Beeraha	291,949,111	56,557,008	-235,392,103	-81%
1410603	Dakhliga Ruqsadda Kaluumaysiga	1,261,878,705	859,277,024	-402,601,681	-32%
1410604	Dakhliga Ruqsadda Macdan gurashada	1,214,037,070	2,063,187,044	849,149,974	70%
1410609	Dakhliga Diiwaangelinta Hantida	26,257,701,783	36,079,133,233	9,821,431,450	37%
1410607	Dakhliga Diwaan-gelinta Maraakiibta iyo Doonyaha	231,069,443	3,850,854,494	3,619,785,051	1567%
1410605	Dakhliga Ogolaanshaha Isticmaalka Dekedaha (Royalty)	46,601,950,463	53,054,960,197	6,453,009,734	14%
1410601	Dakhliga Khayraadka Dabiiciga ah	237,998,286	252,511,560	14,513,274	6%
1410608	Dakhliga Ruqsada Shirkada Dhismayaasha	862,149,825	699,109,437	-163,040,388	-19%
1410602	Dakhliga Iibinta Guryaha Dawladda	35,303,124,701	95,302,411	-35,207,822,290	-100%
1410501	Dakhliga Kirada Dekada Berbera	52,500,000,000	35,000,000,000	-17,500,000,000	-33%
1410502	Dakhliga Kirada Guryaha & Bakhaarada	549,898,760	444,416,907	-105,481,853	-19%
1410611	Dakhliga Kirada Warbaahinta Dibadda		672,000,000	672,000,000	
1410612	Dakhliga Kirada Xidhmooyinka Shiidaalka (Blocks)		1,484,000,000	1,484,000,000	
1410613	Dakhliga Kirada Xidhmooyinka Macdanta (Blocks)		100,000,000	100,000,000	
	Sub -Total	172,362,346,523	184,839,443,073	-30,522,903,450	-18%
1420100	Dakhliga iibka alaabta & adeega				
1420116	Khidmada adeega madaarada	1,268,864,373	1,003,406,408	-265,457,965	-21%
1420117	Daakhliga Faafinta & Iidhehda	920,417,438	59,305,505	-861,111,933	-94%
1420118	Dakhliga Boosaha & Isgaadhsiinta	7,927,057,906	7,001,150,000	-925,907,906	-12%
1420107	Dakhliga Liisamada Ganac/& Ruqsooyinka	19,024,420,667	16,815,632,483	-2,208,788,184	-12%
1420106	dakhliga Warqadda Ogolaanshaha Shaqada	5,471,692,282	6,421,896,654	950,204,372	17%
1420115	Dakhliga Diiwaan gelinta Qandaraasyada	51,787,717,944	35,561,324,584	-16,226,393,360	-31%
1420124	Fiiga Xanaanada Xoolaha (Holding ground)	176,566,238	4,240,652,870	4,064,086,632	2302%
1420201	Ajuurooyinka Maxakamadaha	7,547,243,061	8,073,486,918	526,243,857	7%
1420101	Dakhliga Nootaayoooyinka	472,760,438	327,637,425	-145,123,013	-31%
1420110	Ruqsadda Ogolaanshaha Mihnadaha Caafimaadka	742,034,019	515,726,901	-226,307,118	-30%
1420119	Dakhliga Baadhista Cuntada & Daawada	235,409,700	513,169,577	277,759,877	118%
1420103	Fiiga Iibka Baasaaboorada	2,563,442,201		-2,563,442,201	-100%
1420114	Dakhliga gelista iyo bixista Madaarada (Ajnabiga)	26,982,862,563	20,396,158,076	-6,586,704,487	-24%
1420109	Dakhliga Numberka & Tijaabada Gaadiidka	12,834,094,028	8,843,848,314	-3,990,245,714	-31%
1420206	Dakhliga Ogolaansha Hay'adaha Caalamiga	915,799,300	790,775,863	-125,023,437	-14%
1420113	Dakhlig galista iyo bixiista Baasaboorada Wadaniga	34,630,677	28,016,912	-6,613,765	-19%
1420111	Fiiga Fiisooyinka Baasaboorada Ajaanibka ah	10,501,950,423	13,297,828,827	2,795,878,404	27%
1420104	Dakhliga Buuga Lahaanshaha Gaadiidka	6,389,294,344	4,431,758,744	-1,957,535,600	-31%
1420122	Fiiga Dhoofitaanka	461,838,389	507,150,511	45,312,122	10%
1420112	Dakhliga Mushaaxida Hawada	3,081,687,370	3,897,752,376	816,065,006	26%
1420123	Dakhliga Iibsiga xukanka xadhigga (Jeelka)	677,319,111	530,440,022	-146,879,089	-22%
1420146	Dakhliga Iibsiga Tikidhada	1,524,428,960	2,613,762,680	1,089,333,720	71%
1420105	Dakh/ Darawalnimada	4,199,317,506	4,134,308,197	-65,009,309	-2%
1420147	Dakhliga Ogolaanshaha Dalxiiska	126,456,947	1,020,032,687	893,575,740	707%
1420148	Dakhliga Liisamada Boosaha iyo Isgaadhsiinta		688,000,000	688,000,000	
	Sub -Total	165,867,305,885	141,713,222,534	-24,154,083,351	-15%
1430100	Ganaaxyada				
1430101	Dakhliga Ganaaxyada	15,396,056,768	16,879,152,350	1,483,095,582	10%
	Sub -Total	15,396,056,768	16,879,152,350	1,483,095,582	10%



1510200	OTHER REVENUES				
1920102	Faa'iidada Sarrifka Lacagaha Qalaad	9,000,000,000	21,345,373,093	12,345,373,093	137%
	Sub -Total	9,000,000,000	21,345,373,093	12,345,373,093	137%
	Grand Total	2,768,190,125,789	2,575,931,251,888	220,666,804,069	8%



SOO KOOBIDA GUUD EE KHARASHKA MIISAANIYADDA 2025

No	kharash Haye(Cost Center)	Magaca Wasaaradda/ Hay'ada	Miis. (2024)	Miis. (2025)	Faraqa
1	1010100	Ciidanka Ilaaladda Madaxtooyada	34,417,427,535	35,572,415,105	1,154,987,570
2	1010200	Hay'adda Sirdoonka Qaranka	35,012,657,801	37,236,476,612	2,223,818,811
3	1010400	Ciidanka Asluubta	82,416,504,774	86,362,285,829	3,945,781,055
4	1010500	Ciidanka Booliska	200,073,580,306	212,299,177,715	12,225,597,409
5	1010600	Ciidanka Ilaalada Xeebaha	28,460,965,195	29,480,134,762	1,019,169,567
